# DHABANNA HAYE

Dhame – Xasan Barre C/laahi



# = D H A B A N N A H A Y S =

QORE:

D H A M E/ XASAN BARRE C/LAAHI (CABDI KUUSOW)

= M U Q D I S H O =

DISEMBAR 1987.

---------******------

# H O R D H A C.

SHeekadan aan ugu magac daray (DHABANNA HAYS) waxaan kaga hadlay arrimo ku saabsan nabsiga iyo isla weynida oo aan loo baahnayn in ay qofka bini aadamka ah dhaqankiisa ka mid noqoto oo,uu la dhexjoogo Bulashada uu la noolyahay, asluub iyo qadarin rag iyo dumar kuu doono ha ahaadee, asagoon u kala fiirinin kanaa taajir ah iyo kanaa hanti yar, ee

waa inuu ogaado in bini aadamka maamulkiisu uu ka socdo hal meel oo keliya, hadaba waxaa lagama maarmaan ah in aad qadariso qofka asaagaa ah ee weliba kuu sheegtay in uu dareemahayo arin xasas ah oo waxkala qabashadeedu tahay lagama maarmaan, haddaad se xaqiraad iyo santaag u muujiso waxaa laga yaabaa inme eshaka timaado arin xalinteedu ay noqonayso mashaakil ileyn nabsi baa jira ilaahna waa ku arkaaye oo aad talo u baahato goor aan cid kuu talinkartaa jirin.

Waxaan akhrista yaasha sharafta leh ka codsanayaa in ay hadii wax qaladaad ah kala kulmaan Buugan ay ka saxdaan maskaxdooda.

Waxaa kale oo aan akhristayaasha u sheegayaa in aan soo saari doono sheekadan qaybteeda dambe Sanadka 88 bilowgiisa hadii allaha awooda leh ogolaado.

## QAYBTA KOOWAAD

Inta badan magaalada Xamar iyo agagaarkeeda waxaa ka da'a waqtiga xagaaga, Roobab isdaba jo-og ah, gaar ahaan subaxaas cirka oo dhan waxaa xiray daruuro wata roob, hadaba waxaa gurigoodi ka soo baxay Madaale iyo Muuse oo qaba dharkii shaqada, ayagoo u socda furdada si ay uga soo x-amaashaan, midkood ayaa wuxuu yiri: saaxiib der-bigaan nagu leexi waan dhaxamoonaye,
Guri dheer hoostii ayey istaageen aygoo ka jirs-anaya roobka, hadaba Muuse ayaa waxaa uga muuqa-tay wejiga Madaale caro, markaas ayuu ku yiri; war markaan ku arko waad caraysantahay ee wejiga uun baad dadabtaaye, ma'asalaamu caleykumtii is-laamka ka dhexeysey baad erey cay ah moodey.
Madaale oo uga jawaabahaya hadalkiisa ayaa ku y-iri: war weligaa waad murantaa oo meel cidla ah ayaad ka didaa, ee maraanyohow i dhegeyso, aduu-nyadu way mashaakil badantahay oo waa madow iyo oadaan, waa laba nataano ah oo midba muunad lee yahay, maxaa wiil mashaakil ah gacantiisu maran-tahay, maxaa nacas maraakiib maal intuu ku raro meel kastaba aduunyada macaashkiisu yaalaa, dad-ku waa malyuumaad, qofkastaba wuxuu mudan mowla-haa u qoray; adiguna saaxiibow waxaad ileedahay maxaa kugu dhacay, bal gerbahayga eeg maqaar mi-yaad ku aragtaa!
Asagoo uga jawaabaya hadalkiisii ayuu ku yiri: saaxiib waan arkaa xaaladeena, laakiinse waxaan rabaa in aad ii sheekayso oo aad ila qososho, a-amushaantaadaa i dhibtay, Beeso la'aantana waxb-a gooni ha isaga dhigin, qalbi jileecana iska d-haaf nin ragaa ilaahay kaa dhigaye.

Madaale ayaa uga jawaabay oo ku yiri garbihjisa bal eeg inta ay le'egyihiin, alow yaa gaari ku xiriirsha inta uu dameer qaado ayuu qaadihaaye, war inakeen aan xamaalanee, waxayna galeen Furdada, isla markiina waxay la kulmeen Markab laga dejinayo badeeco aad u farabadan halkaas oo ay ka hawl galeen.

Muddo yar dabadeed, madaale oo saaran baabur taagan markabka dhiniciisa oo sugaya in lagu raro alaabo, ayaa wuxuu maqalay qaylo isla waqtigii isagoo aysan u suurta gelin in uu ka boodo baabuurka dushiisa, waxaa ka kor yimid sanduuq aad u weyn oo ay ku jiraan alaabo aad u culus, oo ka soo fakatay wiishka markabka, kuna dhacay dushiisa.

Muuse iyo shaqaale badan oo joogey goobtaas ayaa u gurmaday in ay ka badbaadiyaan Madaale oo ahaa nin ay aad u jeclaayeen saaxiibadii, laakiin nasiib daro waxay noqotay in aysan naf ku gaarin, kadib markii ay ka qaadeen sanduuqii dushiisa saaraa, isla markiina waxaa loola cararay Isbitaal Martiino waxayna xaqiijiyeen dhakhaatiirtii dhimashadiisi.

Ninkaas xijaabtay wuxuu ifka kaga tegey, Haweeney xaamilo ah oo sidkeedi dhamaysatay uuna ka kelay riyiga muddo aan ka badnayn laba bilood waqti la joogo, oo aan dal iyo dad midna aqoon; Muuse markuu ogaaday in uu dhintay saaxiibkii Madaale ayuu ku wareejiyey dowlada hoose si ay u aasto.

Muumino oo ahyd Xaaskii madaale waxay la yaabtay naqnaanshaha ninkeeda iyo saaxiibkii oo ayan caado u ahayn in ay intaa maqnaadaan.



Walwal iyo walaac ayaa alle ku tuuray qalbigeeda aydoo ay saacadu markaa ahyd sadexdii iyo barkii galabnimo, waxyar kadib ayaa waxaa u soo galay Muuse oo tiiraanyaysan oo weliba hoos u fororra aadna u sii naxay markii uu arkay Muumina. Muumino intay gacanta qabatay oo madixiisii hoos u foororey kor u soo qaaday ku tiri: walaal Muuse ila hadal maxaa kugu dhacay, aaway Madaale, iyadoo ku celcelinaysa hadalkaas; Muddo markii uu aamusnaa ayuu ku yiri: aduunyadu waa maalmo qura, ninkii maanta nool berri waa meyd, ninidkii kastaba qaar baa qabriga lagu moosayaa, berri waxa aad mudan mowlaha ogsoon, wiish aan furdada alaab kaga dejineyney ayuu ka soo fakaday sanduuq, Madaaluuna ku dhacay, marka ninkaas tiisii baa dhamaatay oo waa dhintay ee samir alaha inaga wada siiyo, Geeriduna waa waddo uu marayo noolakasta isgana waxaan ilaahay uga baryayaa in uu janadii ka waraabiyo, aniga naftayda wuxuu ii ahaa saaxiibka keliya ee aan ku leeyahay aduunka, marka hadii aad seeon karto inakeen aan ku soo tuse, aad ku soo samirtid meydkiise.

Muddo dhan hal saac ayaa wax hadal ah oo afkeeda ka soo baxa la waayey, aduunyadii ayaa ku na doobaatay, cirkii ayaa madaxeeda yimid, xubin kasta oo jirkeeda ka mid ah ayaa gariirtey, ilintii indhaheeda ka soo dhacday xabadkeeday qoysey, sidii qof ay naftu ka baxayso ayey hinraagtey, ayadoo guriga derbiyadiisa marba mid qabsanaysa, malana gelinaysa qofkii arka in ay waalatay; waa garteed in ay u muuqato sida aan soo sheeganay, waayo waxay weydey qof ayan la'aantii hurdo ka bogan karin oo aha lafdhabarta nolosheeda . . .

sheegda iyo kii ay ka dooratay dhamaan ragga oo dhan, oo ayna weliba indha saarin meydkiisi, si ay ugu samirto; waxaa Muuse yaab iyo afkalahayn ku sii noqotay markii uu arkay Muumina oo baroorteedii ku sii darsatay nabro iyo xanuun tilmaamaya in ay haysa Fool, ileyn waxay ahayd Xaamilo sagaal bilood ah, oo sidkeedi dhamaysatay, oo habeen ilaahay mooyee ayan taariikh latiriyaa u harin, markii uu arkay in ayan caadi ahayn xaaladda haweenaydaa taagta daran ayuu qaatay garabka oo ku fariisiyey sariir, asagoo ku oranaya walaal isdeji oo ha dhibin Naftaada inta aan kaaga imaanayana dhana ha ugu kicin sariirta, waxaan raadinayaa tagsi aan kugu geeyo Isbitaalka.

Markuu ka soo baxay gurigii ayuu la kulmay tagsi maraya waddada, markaas ayuu u haadiyey gacanta oo uu soo kexeeyey, si uu ugu qaado haweeneyda tabaalaysan wuxuuna u sheegay tagsiilihii in uu u geyn doono naag foolanaysa Isbitaal Banaadir wadihii tagsiga ayaa ku yiri waad iska ogtahay baan u malaynayaa, kibada Isbitaal banaadir iyo xafadda Hodon; wuxuuse ugu jawaabay: war inagee wixii calafkaaga ah waad cuni doontaaye.

Markayna u tageen Muumina oo ay xaaladeedu maraysо oo isku darsatay tiiraanyo iyo xanuun, marka ayaa Muuse iyo wadihii intay ka dogeen Tagsigii ayey soo qabteen labada garab oo ay soo saareen baabuurkii iyadoo aad u taahaysa, muddo dhawr daqiiqadood aan ka badnayn ayey u socdeen isbitaalka, kadibna waxay geeyeen, ayadoo ay ku sii kordheen nabaradii iyo xanuunkii waxaana . . . .



isla markiiba loo dhaafiyey qolka DHalmada iyadoo ay sheegeen dhaqaatiirtii in ay dhali doonto muddo saacad ka dib ah, Muumino waxay dhashay wiil ayadoo ku bariday habeen kaas Isbitaalka oo ayan jirin cid ka warhaysa ama la joogta oo aan ahayn Muuse.

Saacadu markay ahayd Lixdii iyo barkii aroornimo ayey taqaatiirtii habeenkaa shaqada lahaa hugu hambalyeeyeen wiilka ay dhashay, isla markiina waxay fareen in laga saaro isbitaalka oo la geeyo gurigeeda ilaa way caafimaad qabtaaye; Muuse ayaa markii ay ka tegeen taqaatiirtii ku yiri Muumino: waxaan aadayaa magaaladda waxaana soo raadinayaa lacag aan kaaga saaro isbitaalka ee iska sii joog inta aan kaaga imaanayo; Muumino intay soo hinqatay bay ku tiri::alla walaal Muuse Meydkii yaa aasaya?

Muuse ayaa u jawaabay oo ku yiri: shalay baan ribood gareeyey in ayan jirin cid aasaysa marka waxaan ku wareejiyey dawladda Hoose si ay u aasto ee waxaad yeelaysaa halkaaga joog waan kuu soo laabanayaa.

Naxdin iyo tiiranyo iyay sariirta dusheeda kula taahday ayada oo marba jaleecaysa wiilka yar ee uur ku harka ah, markaas ayey tiri:-

Alahayow anaa murugo qaba maanta ii gaar ah
Moowjado hirlaa igu habsaday aan maciinlahayne, Mashaqada aduun anaa mar qura
madaxa lay saaray, Mahigaan roob ah baa
igu da'ay oo daadkii baa imiraye; Mahuraanka Aakhiro ayaa tegey Madaalowe, Mawle waa ilahay ee janada ha ku muquursiiyo
Munkar iyo Nakiir baajire alle hakaaga
maciino.

Ereyadaas oo kale yaa ka burqanayey afka Muumino oo catow iyo tiiranyaba leh.

Muuse oo lagaynaya wadada soo hormarta Isbitaal banaadir oo aan ogeyn meel uu u socdo iyo meel uu ka socdo midna oo garansocdo la' si uu u xaliyo mashaakilkaan kux habsaday oo socda laamiga bartamihiisa oo ay baabuurtu iskood uga leekanayaan ayadoon waqtigu ahaan waqti ayan baabuurtu si aad ah u socnin onin, asaga oo u badnaa dhinaca midig ee wadada ayaa waxaa si kedis ah ugu muuqday laba nin oo dagaalamaya: nimankaasi waxay ahaayeen tuugo ku heshiisan in ay dhacaan qofka ugu soo horeeya ee ay kula kulmaan waddada, waxaan ka mid ahaa hadaladii tuugada: saaxiib saaka xagee wax ka qabanaa quraacdii baa ciriiri ku jirtee subax ay ka xuntahay miyaa waa inoo beryey tuugii kale ayaa wuxuu ku yiri: war ha calaacaline ragbaa ilaahay kaa dhigayey talo keen, walaahi waa subax xun bal wakaase oohin wax ku hel, nin kaa qalbi jilicsan hooyo ma dhalin kii kale ayaa wuxuu ugu jawaabay ninyohow markasta oo aan wada hadalnaba afka yaad igoosataa, hadow markaan bad galnana xaar baad ka wareegi doontaa oo waan ku aqaan hadana waxaas ayaad igula hadlaysaa.

Intuu xanaaqay kii hore markii hadalkaas la yir ayuu ku yiri war ma'anigaad igu leedahay wuxuuna ugu jawaabay: haa adiga ayaan kugu leeyahay; muddo markii ay hadalkaas isku celceliyeen ayaga oo isku qaylyaya ayaa midkood wuxuu yiri: war aniga iyo adigu waan isnaqaan laba qof hoo hada isbaranaysana ma nihin ee waxbana ayaynaan iswaabsanin ee talo aanaa hayee waxaan ku faro yeel, waayahay ayuu ugu jawaabay kii kale, wuxuuna raaciyey kolna wax san ma sheegi doontido iska hadal;



Adiga wax kuu dan ah weeyaan hadii uu xun yahay iyo hadii uusan yahayba ayuu ku yiri; waxaan yeeleynaa markaan aragno qof wadada s. socda feer ayaan isku bilaabaynaa sidii laba qof oo dagaalamaysa.

Wuxuuna ugu jawaabay isagoo ay wejigiisa ka muuqato yaabanaan: aan irsaaqad doonano a. isku ogeyne ma aan isdilnaan keentay. war doqonyohow ma aha ujeedadaydu in aan fe. iska badino ee sidii wax dagaalamaya oo kale ayaan jilaynaa.

Warwuxuu-ku hadlahayo daya anagaaba isku jeednee sidee wax ku heleynaa.

Mar horaa layiri masugto meher maleh, war intaadan hadalka badinin ujeedada aan leeyahay maad iga sugtid aan kuu sheegee, ujeedadaydu waxa weeye in qofka wadada maraya uu arko annaga oo dagaalamayna oo uu midkeen qabto mark kii kalana uu baaro jeebabka qofkaas haduu rabana kii la qabtay in uu yiraahdo warmaxaad ninka iigu qabanaysaa oo uu la diririro, qofk. kalana wax kala qabanaya intuu iska dhigo uu baaro jeebkiisa, sidaas ayaan ku xadi karnaa dadka wadada maraya.

Aad bay u fiicantahay fikradaadu waana u bogey maskaxdaada wanaagsan waana kugu raacay ayuu ugu jawaabay. sidaas ayey isku afgarteen labadii tuug iyagoon ka fikirin waxa uga iman doona, in ay ku khasaari doonaan iyo in ay ku faa'iidi doonaan midna, waa ninkii godka isku tuuray oo kale isaga oo aan arkaynin waxa salkiisa yaala, waa arin saadaasheedu ay adagtahay. Muuse ooy Maskaxdiisu aad isgu buuqsantay oo marba ku baraarugaya hoonka Baabuurta ayaa hortiisa ka arkay labadan ruux ee isku aran markaas ayuu midkii isaga soo xigey intuu garabka ka qabtay dib u soo tuuray oo l dhexgalay

Mar alaale markii uu kala dhex galay ayaa waxaa feer ku bilaabay kii uu qabtay, ileyn heshiiskoodaa ahaaye; Muuse oo ahaa nin ilaahay xoog ugu deeqay ayaa u adkeysan waayey feerarkii ku dhacayey jirkiisa, ileyn horaa loo yiri waayeel xanuunsaday xil ma gartee gacmihiisii xoogga badnaa ayuu isu daba mariyey laba darbadood oo uu mid afka kala helay afarta ilig ee horana kaga soo tuuray, kii kalana ay jebisay daanka.

Cabaad iyo qaylo ayuu af labadii dhawaa aqay tuugii isagoo aad moodayso afkiisa in uu waadi dhiig ah ku soo rogmaday;kii kalana naxdin ayuu indha cadeeyey markii uu arkay saaxiibkiis oo afartiisii ilig ay dhulka yaaliin, Muusena waa iska istaagay oo wax ga can qaadah oo dambe ma uu san geysanin ee wuxuu dib ugu laabtay fikirkiisii dheeraa waxaana ka mid ahaa waxyabaha uu ku fikirahayey;: Albaab dhibaato ah markii uu hortayda ka furmo oo aan dhaaf iraahdo mid kale oo ka weyn ayaa hortayda ka soo baxa, dhibaataba dhibaato ayey ii dhiibaysaa ee tolow muumino iyo wiilkeedii yaraa yaa maciin u noqon doona, hadii ay heli lahayd wax gurigeedii geeya sow uma ahaateen waxweyn.

Afkaartaas tiiraanyada leh ayaa ku soo maaxayey Maskaxdiisa asagoo yabaq iyo hadalo badana ay ku soo dhacahayeen dhegihiisa miskiin bal muxuu ogyahay asaga ayaa tiisii u yaabane; Muuse wuxuu baraarugey asagoo labadiisa garab ay xoog laba askari u kala hayaan oo ay katiinadna gacanta midig kaga shakaalantahay, markaasaa intuu in yar fikirey oo labadii askeri eegay ayuu yiri:nimanyohow umuuraha ilaah kaa itaal roon, naag umul ah oo isbitaalka ku jirta oo ninkeedii shalay



dhintay ayaan u arxan lahaa labadaa igaar ee isdiriraysa yaan lahaa yayna isdiline ayaar kala reeb, ayagaa godkaan ii qodaye anigu waxba ka aanan ogeyne, Maahmaah hore ayaa waxay ahayd khayr aha falin shar kuuma yimaadee.

Askeri ayaa markaa wuxuu ugu jawaabay: wixii horey u dhacay waa dhaceen hadase adaa dhiig geystey, marka waxaan idin wada geynayaa sharciga si aad ugu kala baxdaan;

Labadii tuug iyo muuse ayaa waxaa loo taxaabay saldhiga booliska ee degmada wadajir halkaas oo lagu wada xiray.

Muumino se waxaa kudheeraaday sugitaankii muuse yaab ayaana ilahay qalbiga kaga tuuray,waxaase isaga maqnaanshihiisa ku sii qasbahayey in ah ka fikirto takhaatiirta Isbitaalka oo daqiiqad kasta ku oranyey: aaway dadkii ku keenay Isbitaalka ha ku geeyaan gurigaagii, haween badan oo hada umulay ayaa dhulka jiijiifa ee adigu waad caafimaad qabtaaye.

Nimaan wax ogeynow alow ha ku cadaabin qof ninkii ugu sokeyey saaka xabsi loo taxaabay, cid gacal iyo garab u ah oo ay su geyso midna uusan jirin ayey hadalkaa kula hadlayaan; kusoolaabankii takhaatiirta ayaa ku batay Muumino, iyaduna waxay ku hadasho ayey garanweydey oo aqalkeedii lugo kuma gaarto cid ka saaraysa isbitaalkana uma muuqato, Rajadeedu waa ninkaas Muuse ah oo keli ah isga meesha uu maray iyo xaaladiisa midna lama ay socoto dantuna waxay ku khasbaysaa in ay dhegeysato hadalada ka soo yeeraya taqaatiirta ileyn awood baa dhigtay halkaase, Bini aadamkaan itaal iyo awood uu wax ku qabsado midna lahayn Muumino xaaladeedu waxay noqotay amaahaag iyo

Afkalaqaad aamus oo ha oran.
Muslimo oo ka mid ahayd kalkaaliyayaasha isbitaalka ayaa la yaabtay arinta umushan, markas ayey intay u timid ku tiri; abaayo aaway dadkaagi?
Dadkiianiga i dhalay ama ila dhashay xamar iyo agagaarkiisa ma joogaan, n
Ninkii saaka kula joogey soowninkaagi ma ahayn xaguuse aaday?
Muumino markii ay maqashay ninkaagi ayuu kaqaar qaatay ololkii qalbigeeda ka shidhaa ee ay demineysey, ilantii indheheeda ka soo qubatay ayaa qoysey dhabanaheeda, midabkeedii Maariinka ahaa waxaa fuulay gibil madow sidii aydoo ay haye so qandho ayey gariirtey oo ay kelyaha ka soo boodey aydoo neef guraysa; yaab iyo afkalaqaad bay ku noqotay Muslimo umushan tiiraanyaysan, fikir ayey maskaxdeeda dib ugu laabatya waxaana ka mid ahaa waxyaabihii ay ku fikiraysay: tolow mawacal bay kala soo carartay dadkoodii, kii isbitaalka keenayna ma kii uureyey buu ahaa oo ka dhuuntay markuu ogaaday umulitaankeeda, bal u sug intay xoogaa ka qaboobayso ayadaa kuu sheegi waxa haye, meel ay wax ka qarsato ma joogtee! Muumino oo aan erey kale oran ayaa waxay la soo boodey ereyadan tiiranyada iyo caloolyowga leh: inanyahay aadmigu itaal iyo awood uu wax ku qabsado midna ma laha, waa addoon ka socda maqaadiirta ilaahay waxa ay faraysoo, waxaan ahay qof imtixaaman oo irdaha loo soo xiray, ragga ayaa dumarka u arimiya, anigu waxaan ahay garoob uu ninkeedii dhintay shalay, kii ikeenayna saaxiibkii ayuu ahaa, wuxuuna iyiri waan kuu imaane iska sii joog wax qabsadayna garanmaayo, wiilkan yar ee aad aragtana waa agoon ee alow noo arimi.



Muslimo oohintii iyo caloolyowgii ayey la qaybsatay Muumino ayadoo ka xun dhibaatada haysata umushaas, safaleeti intay ka soo saartay jeebkeeda ayey ka tirtirtay illinta sida xaddhdhaafka ah uga daadanaysey indhaha muumino, markaas ayey waxay ku tiri: abbaayo qadar ilaahay qoonsimaad ma leh ee calooshaada oesho umamul baad tahaye, oohintu kuuma roone; aniga ayaa ku geynaya gurigaagi waxaan kuu qaban karana waan kuu qaban intaad umusha ku jirto, hadana inakeen aan tagsi ku saaree oo ... aqalkaagii ku geeyee.

Waayahay abbaayo kaalmo ilaahay iyo mid aadane intaba waan u baahnahay ee ina wad ilaahay ha ku gargaaree.

Muuse iyo labadii tuug ayaa la geeyey saldhigii boolisika, isla markiina waxaa loo geeyey sarkaalxigeenkii shaqada oo ka diyaariyey qoraal sida uu u dhacay denbiga, kadib markii si dhab ah uu ugu kuurgalay xaaladda sadexdaa nin asagoo kaashanaya waaya aragnimada uu u leeyahhay dunuubta noocaas oo kale ah, ayaa waxaa u cadaatay ujeedada ka dambeysey dhicitaanka arintan; si kastaba ha ula muuqatee, wejikasta ha isu tustee, waxaa lagama maarmaan noqotay in uu mariyo siduu sharcigu farayo oo ah: in loo kala daowo qaado labada dhan, ayadoo ha fiirinayo qof kasta dhaawiciisu inta uu le'egyahay, waxaana lagama maarmaan ah in rifeerto la siiyo dhibana si loo sugo dhaawaciisu inta uu le'egyahhay; tuugadii mid ka mid ah waxaa ka maqan Afarta Fool ee hore, Daanka hoosana waa jabanyahay, waxaa khasab noqotay in loo bandhigo sharciga, sidaa darteed ayaa waxaa lagama maarmaan noqotay in kii ilkuhu ka daateen

Lasiiyo warqad uu isbitaalka ku aado, waxaan-
a lagu daray askeri si loo xaqiijiyow dhaawa-
ciisa; Sarkaal xigeenkii shaqada ayaa u gala-
y Taliyaha Saldhiga oo markaa soo fariistay
xafiiskiisa asagoo gacanta ku wada dhamaan d-
unuubtii xalay dhacay oo dhan;wuxuuna ahaa s-
arkaal xigeenkaasi Kormeere Sadexaad Muudey,
Muudey wuxuu bariidmyey Taliyihii oo ay hort-
iisa yaalaan galal dacwadeed uu shalay ka gaa
ri waayey in uu habeeyo; Kormeere Sadexaad M-
uudey markuu u soo galay Taliyihii isagoo u
socda si qadarin iyo xushmadi ay ku jirto ay-
uu markii uu bariido celiyey kadib ku yiri:
Taliye xalay iyo saaka waxyaabihii dhacay
waxaa ugu darnaa arinta sadexda nin, asagoo u
dhiibay galdacwadeedkoodii una sheegay araintu
sida ay u dhacday iyo in uu yahay Muuse nin
aan dembi lahayn qadar alese uu qabsaday ha-
ba yaraatee se wax dembi ah uusan lahayn,
labada kale se ay yihiin denbiilayaal uqoo-
shay miskiinkaas godka uu ku dhacay.
Taliyihii ayaa ugu jawaabay: aduunyadu waa
noocaas oo weji loo raaco ma laha adigoo ta-
gaad ku jira ayey tumaatida kula heshaa, ad-
iga oo tiiraanyeysan oo aan talo haynin ayey
tafaha kuu xaydataa waxaweeyaan mar taah mar-
na tamashle iyo ciyaar; Markaas ayuu aamusay
in yar isaga oo Bushimaha ku garaacaya qalin
kii uu gacanta ku hayey oo uu yiri hadana:
ninkaa qadarkaa ku tegey oo wixii uu taransa-
day sharcigaa loo taagayaa. ayagoo oo weli ku
jira xafiiska ayaa waxaa u yimid askerigii
lagu daray kii ilkuhu ka daateen oo wada war-
bixintii isbitaalka wuxuuna ku yiri: Taliye
waatan waraaqdii lagu soo cadeeyey dhaawaca
ninkii aan wadey.

Markaas ayuu akhriyey taliyihii asagoo



Gilgilahaya madaxa markuu arkay qoraalkii
warqadda oo ahaa: dhaawac culus, daanka ho-
ose ee bidix waa jabanyahay, afarta ilig e-
e hore labo waa jabanyihiin oo salkoodii c-
iridka ayey ku hareen, labana waa dhaceen o-
salkoodii ma harin.

Ma wanaagsan ayuu yiri asaga oo ku celc-
elinahaya, waxaana u soo galay askeri ka m-
id ah askartii soo qabatay sadexda nin wux-
uuna ku yiri taliyihii: ninka weyn ee muuse
la leeyahay arin tiiraanyo leh ayaa haysata
oo markii aan soo kaxaynayney in uu miyirqa-
bo ma aanaan moodeynin ee wuxuu iila muuqdey
sidii nin waalan ama nin ay ka bateen masha-
akilo farabadan, waxaa kale oo uu ii shegay
in naag umul ah oo uu ninkeedii dhintay oo
uu taageeri lahaax ay jirto, laakiin nasiib
daro waxay ka dhacday in uusan noo sheegin
waxa uu u qaban lahaa iyo habka uu u garga-
ari lahaa.

Waa ii muuqataa arinta ujeedadeedii hore
iyo fikradii ka dambaysey waxaanse ka xumah-
ay in uu dembi yeesho qof daacad ah oo aan
ku soo toosin in uu dembi aadane u geysto,
hadda meel aan wax ka qabano ma joogno dem-
bigana isaga ayaa galay aniguna siduu shar-
cigu ifarahayo waxaan u bandhigahayaa arri-
ntooda Maxkamad si ay xalka ugu haboon uga
gaarto.

Maalmo markii la diyaargareynayey arrin-
toodi waxaa muuqatay in loo bandhigi karo
maxkamad; subax sebti ah saacadu markay ah-
ayd todobadii iyo barkii aroornimo ayaa qo-
lka xabsiga ee saldhiga laga soo saaray sa-
dexdii nin, waxaana la saaray baabuur shaba-
qle ah oo taagnaa xabsiga iridkiisa loona s-
oo diyaarmyey in lagu qaado sadexdaa nin oo
ay dhinacyada ka socdaan laba askeri oo hu-

baysan oo loogu talagalay in ay waardiye ka qabtaan Maxaabiista si uusan nidna uga baxsanin; waxaa la furay iridkii danbe ee shabaqlaha, ayhdoo lagu xareeyey sadexdii nin, oo ay labadii Askeri fadhiyaan kuraasta danbe ee loogu talagalay waardiyaha; Baabuurkii wuxuu u dhaqaaqay dhinaca maxkamadda, muddo daqiiqado ka dib ah ayaa wuxuu iridka ka galay maxkamadda gobolka Banaadir oo u fariisatay arintoodi; subaxaas dad aad u farabadan ayaa isugu yimid maxkamadda, ha noqoto in ay ahaayeen kuwo u soo daawasho tegey iyo garsoorayaashii intaba; muddo yar dabadeed waxaa lagu dhawaaqay: Maxkamaddu waa furantahay; waxaa bilaabatay doodii arinta labadda dhan oo lagu bilabay ninkii afarta ilig, wuxuuna ku yiri doodiisii: anaga oo dirirayna dagaal aan xad yarayn, duqayni ay ku dhafnayd, digta aan isku hayno, daryaan uu naga yeeri buu dibigaa shafka weynleh dooda iigaga keenay, dadyohow hiilo ma dowbaa, daan in layska jebshaayo ilko layska digeeyaa, maqdob noo deganaayo ku darnay sharcigeenaa, dadyohow wayga su'aale, laba way dirirtaa oo dagaal waa dhexmaraa sharcigaase daweeyee hanaloo dacwaqaadee waxa ay igu dileen ma dakanaa na dhextaaley, sharcigii way dumiyeen oo dardaarankii way ka baxeen, qabiilkii aan deminayney bay dib u soo huriyeen gaar ahaan doqonkaas; Maxkamadda sharaftaleh waxaan ka codsanyaa in ay iiga qaado talaabada ku haboon ninkaa aan noo kala qabanin si soomaali nimo ah, hadaadrabtaan ha la'ii weydiiyo ninkii aan horey u dagaalamayney inaan beensheegayo iyo in kale.

Garsoorihii ayaa su'aalay oo ku yiri: war maxaka jira waxa uu sheegayo ninkaan?



Aniga iyo ninkaan waan dirirayney, dabadeed muddo gaaban ka dib waxaa dooda noogaga yimid ninkaa, wuxuuna feer ku bilaabay ninkan, marka anigu meel uu naga soo galay waan garanwaayey.

Ileyn waxay ahayd heshiis ay gaareen markii horeba in ay saaraan denbiga ninkaas, ayada oo ayna jirin wax ku markhaanti kacaya, sida uu falkoodi u dhacay, waxaana la bilaabay akhrintii qoraaladii laga diyaariyey saldhigii booliska, dhanaantoodna waxay u qornaayeen sidaan horey u soo sheegnay, waxaana la guda galay arintii muuse oo ah eedeysanaha keowaad, markaas ayuu garsoorihii ku yiri muuse maxaad ka leedahay eedaynta ay dusha kaa saarayaan nimankaas, wax markhaanti ah ma haysataa, maxaadse isku daafacaysaa?
Dadku waa bini aadam oo ayagoo isdilaaya hadii aad u timaado, waa inaadan isu deynin, kuwanse waa daalimiin waa dugaag bulshadeena daano weyn ku abuura, anoo daacad ilaahay dariiqaa dhexmaraayaan dagaalkoodi u jeedey, dakhar ruuxna u geyso dubaaqaa kuma hayn, ee dagaalkooda qabooji oo dacwadooda u qaad buu danigaygu ahaa, anigu dagaal diyar uma aanan ahayn, ruux la dirirna isma aanan lahayn ee daalimiintan heshiisey dadkay saa ku dhacaan, weliba way ku dilaan, duur intaad ku xirtaan dibedda yaan loo ogolaanin, waa tuugo oo dadkay dhacayaan.

Marna ma ayna jirin, lamana haynin wax markhantiyaal ah oo cadayn karey sida dhabta ah ee uu u dhacay falkani ay u taaganyihiin sadexdan qof maxkamadda, dadkii ugu soo horeeyey iyo Askartii soo qabatay waxay cadeeyeen in ay la kulmeen, Muuse iyo labadan nin midka uu dhaawusu garay mooyee kan kale oo taagan, kan dhaawacu uu gaarayna uu fa dhiyo isagoo cabaadaya, waxaase

Markhaanti madoonto ah dhaawaca uu geystey muuse oo uu isaguba qirtay; tashi iyo dood dheer kadib waxay maxkamadu soo bandhigtay go'aankeedii wuxuuna u dhacay sidan: Muuse oo ah eedaysanaha koowaad waxay maxkamadu ku xukuntay, kadib markii uu geystey dembi ula kac ah oo ku xusan qodobka lamabarkiisu yahay ...... xeerka cqaabta soomaaliyeed oo ah:1

1. Jebin afar ilig, asagoo ku dhuftay fer ula kac ah.
2. Jebin daan hoose asagoo ku dhaftay feer uha kac ah.

Sidaa darteed waxay maxkamadu ku xuntay dembiilahaas 4sano oo xarig ah; waxaa kale oo ay siideysey Maxkamadu labadii eedaysane oo kale ayadoo ayan jirin wax dembi ah oo ku cad iyo cid ku cadaysay midna, sidaa darteed ayaa waxaa loo taxaabay muuse xabsiga waxaana halkaa dembiile ku noqday ninkii miskiinka ahaa.

Muumino waxaa aqalkeedii geeyey Gabar aad u naxariis badan oo ay ku dheertahay u gargaaridda qofka ay waayuhu waxyeeleeyeen balse waad qiyaasi kartaa umul aan haysanin wax u arxama runtii aad bay u dibaato badantahay,xanuunka muumino haya iyo rafaadka intaba waxaa uga sii daran welwelka iyo tiiraanyada xusuusta ninkeedi markii ay timid gurigeeda ee ay muuqdeen dharkiisi iyo sariirtii uu ku seexanjirey, mase ahayn laabqaboojiska iyo ilin ka itirtiridda Muslimo mid dejinahaya holoca ka shidmahaya beerka umushaas weydey kii ay ka dooratay ragga oo idil; ilaahay ma nexee waa naxariistaa, waxay ahayd sabirsiintii ay Muslimo ku sabirsiineysey haweenayda aan haynin taag dhaafsiisan tiiraanyada iyo caloolyowga, hawee-



neydaas aan orankaro ama aan ku tilmaami karo garoobkii ayaanka darnaa, Kalkaaliso Muslimo waxay u muuqatey taageerada umushaas aan gacal iyo gasuuro wax u qabta oo garabtaagan ama ay sugeyso midna ayan jirin ayaa xaqiiqadii la orankaraa waa qof ay ku idishahay garashada qof ahaaneed iyo naxariista bini aadaninimo, marka haba yaraatee [illegible] ah kama ayan gelin kaalmaynta umushaas ayaanka daran, balse tabar xumo dhaqaale ayaa u badnaa waxyaabaha ku noqday hami taagan horteeda si ay taageerto haweeneydaa miskiinta ah ee ayan jirin wax ay suskato oo aan ahayn iyada iyo ilaahay, Muslimo axay ka dhalatay reer aan si daa u hanti badnayn oo aanay ka badnayn kharajka soo galaa maalintii nolol maalmeed kooda, xilkasnimo iyo dadnimo wanaag ay u dhalatay ayey waxay awood ugu yeelatay in ay wax tar muuqda u yeelato haweenaydaas dhiban, marka uma ayan saamixin in ay ka baahi tirto baahida waalan ee haysa ruuxaa taagta daran, wuxuu ahaa xaaladeedu in ay wax u hesho maalinkii iyo habeenkii hal mar, mar mar way jiri jirtet in ay u hesho sadexda waqti ee maalinkii iyo habeenkii, runtii awood aad u yar oo iska dhaaf qof umul ah ee ruuxa caadiga ah ayey ku tahay dhib, hase yeeshee muumino waxay u ahayd kaalmo aan marna la'ilaawi karin, mahad celin iyo duco ay u naqeyso Muslimo ayeyna marna afka ka qaadi jirin; Muslimana waxay markasta oo ay u mahad naqdo ku oranjirtey: waan isku leenahay in aan istaageerno,waxaan ku dhisan islaanimada iyo bini aadan nimada ee waxba aniga ha ii madx naqin.

Oohinta ilmaha yar waxay ku ahayd dhimbil

xanuujisa Muumina ama dhaqaajisa afkaarteeda, soona xusuusisa saygeedii uunasiibkoodu noqon-waayey in ay ku wada waaraan aduunka; alla hoo-oyo iga aamus qalbiga hay dilaacinine, waxay ahayd ereyadii ay sida baraad la'aanta ah ugu dh-awaaqi jirtey marka ay naqasho oohinta ilmaha ar ee agoonka ah, waxay maalinba maalin riixdat oo uu setimaanba setimaan u dhiibaba, waxaa la aaray xiligii ay muumina ka dhaqatay umusheedii waxayna isu diyaarisay sidii ay nolosheeda wax uga bedeli lahayd, waxaaso dhibaato ku noqotay sidii ay ula qabsanlahayd shaqooyinka ay dadku qabtaan, waxayna ahayd gabar yar oo reer miyi ah oo aan nolosha magaalada aqoon sidaa u sii weyn lahay, maxayse samayn? dantu waa seetee? waa inay dhabarka u ridataa agoonka aan ka war-hayn dhibaatada haysata hooyadii oo aduunyada joogay malmo tirsan, wax uu yaqaanana ay jirto naaska hooyadii iyo gacmaha naxariista leh ee ay ku qabato, marka waxay bilawday in ay d-iyaar garaysato alaabtii ay ku hawl geli lahayd oo ah: Teermuus, Jelemad, Bakeeriyaal, baaldi iyo burjiko, aydoo go'aan ku gaartay in ay karis shaah, ay ka dayato nolol maalmeedkeeda iyo wiilkeeda caanihiisa, ileyn awood nuruq ahaaneed iyo mid maskaxeed intaba uma laha shaqo kale oo ka dhib badan ama ka dhibyar, mida ay go'aansatay in ay qabato, waxay ku bilowday hawsheedii laba boqol oo shilin oo ay siisay Gabadha qaybt weyn kuleh nolosheeda, kadib markii ay tashi ku gaareen qabasha hawshaa iyada ah, arintaasi waxa ahayd mid hir gashay, ayda oo ka hawl gashay ee gaab.



Xaqiiqdii dhibaato aad u adag ayey kala kulantay haweenaydaas ilmaha mujuqa ah sidata, ee aan hay-san wax gacan yare ah oo ka reeba rafaadkaa hayst-ta dhibaato kasta ha ku ahaatee guntiga ayey dh-iisha isaga dhigtay maalin oo dhana waxay u ahayd shaqo ayadoo dusha ku sidata abaydinkeedi, sidaa ayey door bidayin in ay ku hagaajiso nolosheeda; Maalinba maalinta ka dambaysa aad ayuu u korayey inankeeda yar ee ay ku magacawday Mooge; maalin ayaa waxaa dhacday in ay u qabeysey mooge oo fad-hi xejis ah ayada oo cayaarsiinaysa ayaa waxaa w-ejigiisa uga muuqatay furfrnaan, iyo qosol saa'id ah, markaas ayey iyadoo faraxsan ku heestay. Wacanow hooyow Wanaagsanaydaa, adoo weynaada oo waa yuhu kuu hiiliyaan, adoo wehel ii noqdoo weerwerka aan maanta qabo waxyeelada iiga tura, qa-lbigayga walaacu galay haraadkan iwiiqay een la sii weydoobay baan inaad iwaraabiso weynahay ka tuugayaa.

Heestani waxay ahayd mid aad u saamaysay sh-ucuurta muumino, waxayna isugu jirtey maaweelo i-yo duco ay uduceyneyso inankeeda yar ee aan la qiyaasi karin Maxabadda ay uqabto; haween badan oo saaxiibadeed ah ayaa kula talin jirey in ay uursato nin, laakiin taladaasi uma ayan cuntami jirin mana ayan xiiso gelin jirin, balse waxay o-ran jirtey anigu nin ma rabo ilaa aana arko Mooge oo reer leh; kaasi wuxuu ahaa go'aankii ay gaart-ay haweenaydaa itaalka daran leh, xaqiiqdiina wa-xay ka ahayd yaan wiilkaagu gacan rageed kaa gel-in, mana ahayn go'aankaasi mid ay ku saxmayd, sa-babtoo ah waxay ahayd qof da'yar oo u baahan in ay hesho ruux la qaybsada nolosheeda, isla markaana ay dhasho ilmo garab u noqda wiilkeeda Mooge iyo oday aabihiisii

labaad ah ayadana uga soka mara xalinta baahida nololeed ee ay maalinkasta la kulmayso; dhib waxay soo martaba wuu u koray wiilkeedi oo wuxuu weliba u koray si wanaagsan wuxuuna noqday wiil ay yara ntiisii qofkii arkaaba uu jeclaysto, xagga dhaqanka, muuqaalka dadnimada iyo dabeecadda intaba, wuxuuna noqday mid aan u barbaarin sida ay caruurtu badantahay oo ah: waxyaabaha ay ku cayaaraan, sida orodka dariiqyadda iyo wixii la mid ah;durba isga oon gaarin toban sano ayuu bilaabay in uu u shaqeeyo hooyadiis wuxuuba ahaan jiriyey Jeeble gada sigaarka kuna gada Suuqa ceelgaab, hooyadiina waxay u noqotay kaalmo aad u weyn marka uu ka garab shaqeeyey wiilkeedii, waxayna u aragatay in uu aakhiritaanka anfici doono oo uu noqondoono kii ay ku nasan lahayd, mustaqbalka dhowna uu ka reebi doono dhibka xaddhaafka ah ee haystey mudda badan, ilaa iyo intii ay weydey saygeedii, aad ayey ugu riyaaqi jirtey markuu u soo galo galabtii asagoo gacanta ku sita sigaarkii iyo Lacagtii uu ka soo iibiyeyba, waxayna ku oranjirtey: Hooyo alow aanan ku waayin makeentay lacagtii iyo sigaarkii?

Hadaba waxaa iyada welwel dheerad ah ku ahayd in ay ka dilaan ciyaalka aan tarbiyadda lahayn ee jooga suuqyada ayadoo mar kasta su'aali jirtey inankeeda bal in ay jiraan cid ay dagaalameen ama disheyba; taasi waxay ahayd waxyaabihii uu kala kulmi jirey Mooge hooyadii markii uu ugu yimaado hoygooda ayadoo aan jeclayn wiilkeeda waxyeelo in ay soo gaarto saxar isha kaga dhacaba allaha ka dhigee; wiilkaa yar ee agoonka ah iyo haweeneydaa dhashay ee garoobka ah ee ka dhaaratay in ay rag afka u kala qaado ilaa ayx aragto Agoonkeedaa yar oo is anfacay, waxay ku noolaayeen waayhii dambe nolol aan



sidaa loola sii yaabi karin anolol maalmeed kooduna ma ahayn mid ka hooseeya qoysaska heerkooda ah, hadal iyo dhamaantiis waxay ahaayeen kuwo hela maciishadooda maalmeed; Moogena wuxuu ahaa maalinba maalinka ka dambeeya mid sii isyaadsada waaya aragnimo asagoo wax ka bedelay qaabkii uu u gadijirey Sigaarka iyo waxyaabihii kaleba oo ahaa in uu gacanta ku wareejiyo dhowr baakadood oo Sigaar ah, hadana wuxuu gaaray in uu ku riixo gaari gacan alaabo isugu jirta sigaar iyo waxyaabo kale oo yaryar, wuxuuna gaaray heer uu ka joojiyo hooyadiis shaqada waxayna u dhacday sheekadoodi sidan: hooyo waxbadan baad soo rafaaday maantana waa maalinkii aan ku nasin lahaa ee aan kaa joojinlahaa dhibaatada aad dhowr iyo tobanka sano ku soo jirtey, ee waxaad yeeleysaa gurigaaga iska joog, Suuq dambana ha aadin anaa kuu shaqeynaya oo aad iga taqaanaa waxaad cunto iyo waxaad xirato, ee Hooyo iska fariiso waxbadan baad soo cadaabnaydee.

Muumino oo farax daraadii ay ilintii ka qubatay qoysey laabteeda, ayaa intay wiilkeedii labada dhan ka shumisay ku tiri: illaah baa mahadaa iska leh in aad maanta ii shaqeysana waan u baahnaa, dhaaxaan arki jirey haween gurigooda iska jooga oo aan naftayda ku oranjirey: tolow goormaad sida haweenkaas ku nasan doontaa Gurigaaga, waa sugaayey in ay isoo marto maalintan oo kale, Hooyo hadalkaaga waan aqbalay wax aan dhadhamiyo oo ka macaan xooggaaga umalayn maayo in ay horay iisoo mareen dibna ay ii soo mari doonaan, waxaan Illaahay kaaga rajeynayaa guul iyo in uu garabkaaga galo;
Halkaas ayuu ku hariyey Muumino Agoonkeedi .

yaraa kagana reebay rafaadkii iyo dhibkii ay ku qabi jirtey shaaha, ay ku karin jirtey suuq, ay-adoo ayan wada ahayn dadka suuqyada jooga maanta dhamaantood dad wada xilkas ah oo ay kala kulmi jiretay barkood aflagaado, qaarna tixgelin iyo xaq dhawr jeegto ah, sidaa darteed waxay hawsh-eedii ka hadhay aydoo aad u faraxsan kuna shuk-riyaysa Eebbe.

Mooge oo aad u faraxsan ayaa suuqa u riisdey gaarigiisii, uu ku watey alaabtiisii yaryarayd, sida suuqyadeena maanta, asagoo ku dhawaqaya e-reyo uu ku xayeysiinayo badeecada uu wato, era-yadaas waxaa ka mid ahaa: Sigaar waa kan dalkee-ena, daroogo maanka doorinaysa ood la daciifay-so ma aha, Dayax weye midkaani, asagoo kor u q-aaday Baakadkiisa, soo didaay dadyohow yaan la-idinka dhamaysanine, Galayrkaa ka sii daran, i-skaadhaaf dalkeenee daundaa dalbatoo dayuuradaa la saaraa, Faraskana warkii daa, dowladaha dhama maantood danaanday u keeneen, dadyohow waa ig-a dardaarene dan kuway ka haysow degdeg iigu k-aalaya; Sigaar... asagoo leh ayuu qaaday wadada maka almukarama, una socda degaandega wadda ba-kaaraha oo doonaya in uu dhigto badeecadiisa h-akadka baabuurta kasoo horjeedka Boostada Hodon; halkaas oo ka mid ah meelaha ay dadku ku badanyi-hiin, Mooge waxaa jeclaa asxaabta ay isku da'da yihiin, ee ay ku kulmaan meelaha wax lagu iibsa-do, iyo kuwa ka waaweyn intaba, wuxuuna ahaaa w-iil edeb badan oo aan u dhaqmin sida ay u dhaqm-aan barbaarta da'diisa ah, balse nasiibxumo waxa u ahayd isagoo aan gelin iskuul, dhaqaale xumo i-yo duruuftoo u saamixi weydey awgeed, iyadoo ay taa jirto hadana ma uusan ahayn nin ku kooban ii-



binta xabadaha sigaarka ah oo keliya, wuxuu-ran jirey habeenkii dugsiyadda wax barashada ka waaweyn iyo saacad galabtii ah oo uu bar-rey af ingiriiska, sidaas ayuusan u ahayn nin oo man akhriska jeornaalada iyo sheekooyinka. Nuur ayaa ka mid ahaa asxaabta uu ku kalsoon, ayna wada socdaan markasta inta ay jiifka ku qanyihiin mooyaane, labada inan oo ay da'doo dhaxayso shanjyotoban ilaa labaatan waxay ah on kuwo noqon kara tusaale xagga dhaqanka, i sluubta intaba, balse aan eegno maalinta ay u uqatay Mooge inanta jiidatay indhihiisa, ga aragtideeda uu mooday in uu ku riyoonayo, wa eerlula oo aad Moodeyso Dayax shan iyo toban ah, oo weliba ka dhalatay reer ladan, oo aan weyneyn xagga da'da Mooge, aanse dihi karo s ama labo ayey ka yartahay, oo ilaahay ku man ay suurad wanaag, waxayna ardayad ka ahyd du siga Hoose DHexe ee dhagax tuur fasalka 8aad; oge iyo Nuur oo wada tagan meel u dhow isku iridkiisa ayaa gaari lagu keenay lajoojiyey m u dhow oo aan sidaa uga sii fogeyn, markii ay ga dhilka soo dhigtay ayey qabteen indhihiisu xuuna kala soo laaban waayey eegnadii, indhuhu la raacay, ilaa ay ka gasho iskuulka ee ay ka rsoonto, Nuur marna wuxuu fiiriyaa Mooge, marna wuxuu fiiriyaa Beerlula, isgoo la yaaban eegna aan kala go'a lahayn ee saaxiibkii wuxuuna ku yi-ri: waryaa maxaad gabadha sidaa ugu fiirihaysaa.

Nuurow dumarku waa kala habeenyihiin kalan haybad wanaagsan yihiin, qaar baa sidii hilaac abeen aad u madow goortuu hanaansado hareera ftiinshee, qaarbaabad hibashada ku hanqaar ood hurdo seexan weydaa, qaarbaa kuwaa ugu abuur o harka kaaga dhaartee, ... deedii ... rtay hortaana

talaabada habsamida ah sii hitiqsanaysay in-indhuhu hayniwaaye, mahoobaan da'aysoo dhul haboon ku hoortaa.

Nuur oo u arka saaxiibkii Mooge in uu yahay arigti yare si fudud ula kacay laabta ayaa uga jawaabay oo ku yiri: halhaleelku waa maxay hibashadaadu fududaa, maqofkii haatan marayuu hamigaagu raacoo hadda sheeganaysaa, ma adoon haasawe iyo sheeko kuu horeynbaad is hanqaarinaysaa, ruuxaan hugeediyo hoygey seexanaysiyo biilkeeda heli karin hanqaltaagu waa maxay.

Saaxiib gabadhu waa ijiidatey oo ibeer qaaday miyaadan arkaynin yarta quruxdeeda; wuxuu u hadlay Mooge sidii qof xishoonaya oo kale, waxaadba moodaa in ay gabadhii hotiisa taagantahay, layaab malaha oo jacaylka dh dhan wuxuu ka unkamaa aragti iyo dareen caadifadeed oo wadajira; Mooge oo hadalkiisii sii wata ayaa saaxiibkiis nuur weydiiyey in uu yaqaan gabadha iyo in kale, Nuur oo u arka in uu yahay saaxiibkii in uu gelaayo sheeko aan loo baahnayn in uu galo ayaa ugu jawaabay: hadaan aqaano maxay aqoontaydu kuu taraysaa maxaxbaan kuugu qaban karaa!

Ujeedadayda Nuurow ma aadan fahmin.

Ana waxaad gaba ka rabto ma aanan fahmin. Gabadha wax dhib leh kama rabo,waa iska caadi barasho furan iyo sheeko ayaan ka rabaa. aderrow han weynida iska dhaaf, tan mid adiga iyo aynigaada oo kale la hadlaysa ma aha,marka hadal aabihii dhintay ha inagu dalinine wax lacag ah maxaad haysaa hadhow aan kuu celiyee saaka ma aanan soo quraacanine.

Waar ninyohow xaqiraada iga dhaaf waxani waa naag, Rag bayna u joogtaa ee qalbiga ha iga diline hadaad qoka ila qaban karto ila qabo hadii kale iga dhaaf nacasnimada.



Saaxiib inagu waaxaan nahay reero tabareed, suuqaas ayaan ka xamaalanaa, waxaa fiican qofku inuu yaqaano dantiisa iyo heerkiisa; yartan aad arkaysid nin lacag leh ayaa dhalay, Aabeheedna iyada iyo wiil yar ayuu dan ka leeyahay bal fikir gabar nolol heersare ah ku kortay adoo gaarigacan wadada la fadhiya oo laga yaabo in ay ka xis hooto in ay wax kaa gadato, amabax ay isk kala weyntahayba, hadal ay kula hadasho iyo sheeko ay kula sheekaysato wrkeed iska daaye, ogow Moogow shinbir waliba kan la midabka ah ayuu la duulaaye!.

Nuurow waan garanayaa hadalkaagu meesha uu u biyo shubanayo laakiin anigu yartaas waxaan isku deyahayaa sidii aan ku baran lahaa.

Nin baa layiri magacaa wuxuu yiri looge, Looba joogaa layari Loogow hadaad loogi doonto; waan kaa warsugayaa arintaadu waxa ay ku dambayndoonto.

Nuur waa ka dhaqaaqay wuxuuna bilaabay in uu hawshiisii wato, halka Mooge ka sii eegahayey iridkii ay Beerlula ka gashay oo uu jeclaan lahaa in ay mar labaad soo baxdo si uu eegmada uga bogto, waxaase isweydiin leh oo loo baahanyahay in la ogaado inay ogtahay Beerlula ninkaas jecel in ay soo marto indhihiisa hortooda mar labaad; Beerlula waa qof ayna waayuhu waxyeelo u geysan, waa gabar ay da'deedu yartahay oo ku soo kortay guri ladan iyo koolkoolin, waa ruux aan la socon baasaha waqtiga, waaya aragnimadu waa qaali waana aqoon lays dheeryahay oo loo baahan yahay qofkasta oo ku nool aduunyada in uu lahaado, haba kala heer sareysee si uu uga hortago duruufaha kala duwan ee ay abuurayso nolosha maalin

joogtada ah; hadaad arinkaaga u dhiibato hor-ta ma kaa aqbali doontaa, xagee wax ka bilowda marka u horeysa ee aad la kulanto intaad raganimo iska daydo ma waraysataa iyo war waad degdeg badantahaye kaadsiinyo yeelo hafuduudaanine, su'aalahaasi oo dhan waxay ahaayeen kuwo ku meeraysanayey maanka Mooge dhwr maalmood; maalinba maalinka ka dambeeya yuu ku sii kordhaayey jacaylku; hadaba waxaa fiicnaan lahayd in ay jirto ruuxiyad u adeegeysa si ay ugu gudbiso dareenkiisa qalbiga. Beerlula ee Moog dabka ka shidmay ka kan Mooge; Beerlula way ku cusbayd iskuulka a n horey u soo sheegnay, wuxuuna ahaa sanad dugsiyeedkii ugu horeeyey ee ay dhigato iskuulkaas oo furnay muddo aan ka badnayn Bil, marka way ku adkaatay in uu u kaashado ama uu u dirsado qof kale, waayo aqoonteeda xagga dhalinyarada ayaa yar sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in uu ku kalsoonaado naftiisa, waxaa xusuus gaar ah ku reebtay markii uu arkay goor abaarihii ay tahay tobankii iyo barkii kadib dhowr maalmood aragtidiisii hore, markuu dhacay gambaleelkii iskuulka oo la furay iridkiisii weynaa ardayduna u soo baxeen banaanka si ay u soo shaahaan oo ay arday aad u farabadan ka soo burqatay iridkii ayagoo is wada garbinaya, markii uu buuqii badnaa ee ardayda ka yaraaday albaabkii oo ay bilaabeen-in ay mid mid u soo baxaan ayey ku soo beegantay Beer lula oo aad moodeyso suuradeeda laan qoton u baxday oo ay daruuri si haqab la'aan ah u heshay, laydhuna marba dhinac u jaleecinayso, qurux, qirix lagu daray qalbigay waxyeeshaa, qofkii arkaba si koontorool la'aan ah ayey indhuhu



uga raacayaan ayaa ka soo baxday albaabka aydoo si hanaan wacan u laafyoonaysa; Mooge oo ay dhawr aday sigaar. iyo alaabo kale oo yaryar ka gadanayaan ayey indhihiisu si lama filaan ah u qabteen Geenyadaas loo gacaloonayo, eegmadii ayuu kala soo laaban waayey ilaa ay dhalinyaradii wax ka ibsanaysey ka dareemaan, ardayii mid ka mid ah a yaa ku yiri:-
Waryaa yarka intuu garabka ka taabtay, in dhaha wax kaga goyn mayside maxaad sidaa ugu fiirinaysaa? Arday kale ayaa soo boodey oo ku yiri: War quruxdeeda balfiiri yarku waa gartiise. Mooge oo ku baraarugay hadalkii yarkii dambe oo yare khajilsan ayaa ku hadlay hadalo is yar daba marsan oo ah: maya, maya yarta ma aqaano, anigarа ima taq ono; qosol intay la wada daateen ayey ka dareereen isgoo halkiisii fadhiya,-Mooge oo weliba qosol loogu daray hadaladii kajamaada ahaa ee ka xishoodsiiyey wuxuu dareemay in uu khalad - galay, runtiisii marka loo fiiriyo dareenka uu u qabo gabadhii sida hilaaca hortiisa u martay, qosolkaasi ma ahayn mid wax yeelo u geysanay shucurta caadifadeed ee kasabtay in uu eegmo keliya laabta ula kaco, balse dadka barkood marka aad aragto, gaar ahaan haweenka waxaad malaynaysaa in aad hore u arki jirtey, waayo wejiga qofkaas aan soo sheegnay waa ka aan marna ka maqnayn sawir maskaxeedka qofkaa, ruux kasta oo nool wuxuu leeyahay doorasho u gaar ah waana tan allaha woodda leh uu u kala bedeley muuqaalada dadka, hadaba maadaama uu ilaahay u abuuray qof kasta ikhtiyaar wuxuu abuuray neweiyad kala duwan oo ku salaysan doorashada uu leeyahay qof kasta, marka Mooge noloshiisak kama hor imaanin fursad

calwixsa arintiisa hada ka horow wayna kala duwanyihiin qofka waayo aragga ah ee la soo kulmay arimahaas caadifiga ah iyo kan cusub ee hore u heedka ah, sida ay marada cadxiyo tan midabka leh wasakhada ukala qabsan ogyihiin ayey iyaguna ugu kala nugulyihiin arimaaha xasaasiga ah; Mooge oo halkiisii fadhiya ayey dhalinyaradii ku-soo laabteen iskuulkii waxayna si kedis ah indhihiisu u qabteen Beerlula oo geed har qabaow hoostii taagan oo aan sidaa uga sii fogeyn Mooge oo u oomanaa aragtideeda,ayaa si habsami ah wejiga ilaa faraha fiidooda indhaha ula raacay, ayaduna way ka baaraad la'ayd ruuxaan ku maqan oo kama ayan warqabin legadanka dhaxmaraya ninkaas iyo naftiisa oo ah: mala hadashaa mise waa iska deysaa maxaad yeeshaa?

eegmo ay dhankiisa soo jaleecday ayey u adkaysan weydey indha sidii warankii u dhaafaya markaas ayey geedkii oo dhan uga tagtay asagoo weli sii daawanaya sii jeedkeeda wanaagsan iyo xubnaha dhildhilan ee ay ku laafyoonayso, waxay indhihiisu aragtidii caadiga ahayd soo ceshadeen markii ay ka qarsoontay; dhamaan hareerihiis oo dhan ayuu eegeegay sidii asagoo aad moodo in uu gabal ugu dhacay dhul eeri go'an ah, wuxuu sare uga booday kursigii uu ku fadhiyey goobtii oo dhan wuu ka soo guuray asagoo niyad xumi awgeed la jiitamaya ood moodayso in uu soo guuldaraystay ; aqalkoodii ayuu iridka ka soo galay asagoo aamusan, hooyadii oo islaamo la fadhida barsada ayaa waxay isweydiiyeen waxa saacadan soo celiyey; duq Gulumo oo ka mid ahayd haweenki halkaa fadhiyey ayaa Muumino waxay weydiisey waxa helay wiilkeeda, waxayna ku tiri:- Kadigaagi ma xanuunsan yahay waakan saacadan soo gurya noqdaye?



Alla ma ogi(Bismilaahiye) fadhigeedii ayey ka istaagtey aydoo isleh bal soo eeg kaalada uu ku sugan yahay wiilkaagii , waxayna weydiisey meesha laga hayo iyo waxa ku kalifay in uu soo laabto saacadan ,wuxuuna u sheegay in ayan jirin wax xanuun ah oo sababay imaatinkiisa, ay se jirto suuq xumo iyo isaga oo ka caajisey fadhiga, una baahan in uu nasto, marka Muumino waxaa u muuqatay in uu iska seexdo ilaa iyo qadada si uu u caajis gooyo; mooge intuu si halhaleel ah dharkii isaga saaray ayuu isku tuuray sariirtii; Muuminana waxay dib ugu laabatay Haweenkii ay la haasaaweysey; ayada oo sii socota ayey u sheegtay in uu caafimaad qabo waxay na ku tiri: indhaxumo alow hay tusine waa caajisanyahay mooyaane wax xanuuna oo kale ma hayo.

Duq Gulimo oo u qalbi qaboojinaysa ayaa ku tiri: ilaahay ha kuu caafiyo Muuminay cidkale oo aan isaga ahayn ma haysatide. Hami iyo walaac ayaa rabi ku tuuray qalbiga mooge; xageed wax ka bilowdaa bay ahayd su'aasha keliya ee hortiisa taaley; kplba waxay dhan iska tustaba, marba waxay daaqad cusub istaajisab, dhalanteed waxay hortiisa ku sawirtaba,wuxuu arkay wadada ku haboon ee uu kula xiriiri karo in ay tahay warqad uu ku cabirayo kuna ban dhigayo dareenkiisa oo uu isaga naftiisu u geeyo, asagoon adeegsanin cid kale, hadii uu qof kale u dhiiban lahaa wuxuu ahaan lahaa saaxiibkii nuur dantaase ku kaliftey inuu isaga keligii xaliyo arintan taala hortiisa; qalin iyo warqad ayuu ku diyaarsaday miis dushii asagoo arka in ayan ahayn munaasab saacadan in uu wax qoro, balse

Sariirta ayuu dib ugu laabtay wuxuuna galay hurdo dheer; Muumino oo rabta in ay diyaariso qadadii ayaa u soo gashay isaga oo jiidaya hurdo macaan, markaas ayey nafteeda ku tiri: Moogahaygii maanta hurdo ayuu la caajisan yahay, intay bac khudradi ku jirto gacanta midig ku qabsatay, mindina miiska ka qaadatay ayey iridka ka baxday iyadoo wadata hawsheedii iyo adeegeedii, waxayna diyaarisay qadaddii abaarihii goor ay ahayd kowdii iyo barkii duhurnimo, balse waxay ku hamiday in ay toosiso, laakiinse waxay door biday in ay u deyso hurdada qadar saacad ah oo ay istiri way ugu filantahay hurdo; ka dib intay soo kacday ooy ayaar sariirta gees kaga fariisatay ayey madaxa marada kor uga qaaday aydoo wejigiisa xoogaa fiirinaysa, ayey gacanta intay wejiga ka s artay ka toosisay hurdadii; Mooge intuu jimicsaday ayuu fariistay, qadiir daqiiqado ah markuu fadhiyey ayuu istaagay oo kirli iridda yaaley qaatay, wuxuuna dul tegey ashuunkii oo uu kaga dhaansaday biyo, kadibna waxa uu galay Musqushii; Muuminose waxay habeyneysey qadadii oo ay karisay waqti hore, isna iridka ayuu ka soo galay wuxuuna ku fariistay kursi ay hooyadii ugu talagashay, qadadii ayuu qofba dhakkiisa ka cunay ayagoo aamusan sida caadada soomaalidu ay tahay, ..Mooge maalinkaas iyo habeenkaas dhanna ugama uusan dhaqaaqin gurigooda, wuxuuna sugahayey inta ay hooyadii ka seexanayso oo ay ka kala degeyso saanta dadka wuxuuna sugahaye fursad uu isdhihi karo waxay ku haboontahay in u diyaariyo ereyo uu ku beer laxawsado gabadhaas, waxay ula muuqatay sideedii iyo barkii habeenimo



oo inta badan ay seexdaan haweenka iyo carurta in ay tahay waqti ku haboon diyaarinta warqad uu u qori lahaa gabadha sida sahlan u handi... Ibigiisa, kuna xidhay hoggaanka, waxyaabi... warqada ku qoray waxaa ka mid ahaa:-
Walaal waxaan hawada kuu soo marinayaa sal isleeyahay qof ka mudan oo aad ku sala mi ... ma jiro, salaan soo dhexmartay saableyda f... sambabada dhexdooda, ayaan kuu soo sidaaye... bo furan ku gudoon; walaal waxaan kuu sheeg in aan ahay nin ku sumoobay suuradaada ...an ee ilaahay kuugu deeqay, waxaan ahay nin s... ah oo hurdo seexan waayey, waxaan ahay nin nkaa ah oo gacalo weyn kuu qaba, igargaar ahay oo gacantaada ii fidi; walaal waxaa i cay dharaaro dhawr ah oo aan ku arkay, ar... na waa mid aan iga hari doonin inta aan a... a guudkeeda ku neolahay, sidaa darteed waa... eelahay, waxaana kaa rajeynayaa in aad idh... onto ku jantay ( waa Mooge oo kuu ooman).

Mooge intuu warqadii galaystay ayuu b... tiisa hoosteeda gashaday, markaas ayuu u so... dhacadiid isagoo aad u fikiraya; mar mar b... odeysaa in uu filin kuu shidanyahay sida a... grogeyso maskaxdaadu waxayaabo aad ku hamin... hadaba waxyaabaha habeenkaas mooge hortiis... ey waxay ahaayeen: afkaar ku saabsan inant... yarleh ee aan laga yaabin marna in uu ka f... fikirkiisa muuqaalkeedii quruxda badnaa, ... unaageedii ayaa sidii sawir hortiisa u soo ... gayey, laakiinse hurdo ayaa ku simiweydey ... quruxdaa maskaxdiisu ay abuurayso uu si f... ga bogto, muddo ka dib wuxuu maqlay hooyadii ku leh:-

Mooge hooyo miyaadan ka cayn saaka?
intuu fariistay oo uu sheydaanka iska naaray ayuu sare uga istaagay sariirtiisi asagoo miiska ka dul qaatay caday, katabaankana shukumaan oo uu isu diyaariyey in uu quraacdo; kadib markuu quraacday ayuu warqadiisii horay jeebka ugu sii qaatay asagoo u sucda halkii uu horey ugu hamiyaayey, wuxuuna fariistay mee shii u caadiga ahayd ee uu kula kulmi jirey saaxiibkii Nuur, oo hortii soo fariistay wuxuuna ku yiri-

Subax wanaagsan Nuurow.

Arooryasuuban, Moogow.

Geenyadii dharaartii dhoweyd ma gudubtay?
Warninyohow ma falantahay, ilaa iyo setemaan kan oo dhan maxaa ku daba dhigay gabadhaa?
Nuurow horaan kuugu sheegay heerka ay iga marayso ee saaxiibow ama wax ila qabo ama niyadda hayga dilin . meel aan wax ka qaban karo iyo mid aanan waxaba ka qaban karin ayaa kala jira, xaaladan waxaan u arkaa in ay tahay mid aanan wax ka qaban karin, waayo waxaan ka baqayaa gabadhan yar in ay sharafta iga disho ee Moogow waa kugu keligaa.

Nasiibkaygaan qabaa wixii rabi ii qorayna waayimaayo, ee saaxiibow hay dhihin waa kugu keligaa.

Nuur ayaa arkay Baabuur istaagay meel u dhow ayada oo ka soo degeysa markaas ayuu ku yiri Mooge: Moogow wataa yartii aad i haybinaysay Baabuurka ka soo degeysa.

Moogaa intuu istaagay oo ka dabategey gabadhii ku yiri: yarta abaayo isug.
Beerlula intay istaagtey bay sugtey;kadibna Mooge intuu jeebka gacanta geliyey oo ka soo saaray warqadii ayuu u dhiibay, wuxuuna isgoo faraxsan ku laabtay halkiisii, kadibna Nuur



ayaa ku yiri Mooge: Moogow arintaadu waa kulushahay walaahi,hadda waxay gaartay heer aad arji qorto.
Ahiga iyo adiga Nuurow go'aan ayaan kala gaarnay ee indhaha iga fiirso inta aad qaylo iga maqli doonto. wax dood ah oo aan ka qabo ma jirto.

Mooge waxay u ahayd maalintaas warwar iyo walaac joogto ah waayo wuxuu sugahayey jawaabtii warqadii uu gacantiisa ugu dhiibay gabadhii uu sida Bisha u shinsanahayey; waxaase xusid mudan fikradda ay ka qabtey beer lula warqadii uu u dhiibay inanka ayan aqoonta u lahayn, waxaa arin lama filaan ah ku noqotay markay dhuuxday ujeedadii ka dambaysey warqadaas, waxaa u cuntami weydey in uu jeclaado wiil sigaar iyo xanjo iskuulka hortiisa ku iibiya oo ay u aragtay in ay ku tahay gaf iyo sharafxumo hadii ay uga jawaabto warqadan, Haweenku waa indho ku garaadle intooda badan aan dulucada hoose ee dhabta u daadegin, waxaa kaaf iyo kaladheeri ku noqotay jacaylka uu la taahayoo inanka sida ay iyadu qabto aan la heerka ahayn halkii loo baahnaa in ay ka baaraan degto tabashada Mooge ayey xaqiraad iyo xasid muujisay aydoo dildilaacisay warqadii kuna riday meel qashinka lagu ururiyo oo ka mid ah gurigooda, weliba qofka binaadamka ah waa la xurmeeyaaye isma ayan oran xurmee oo uga jawaab mayaba aad dhahdide;
Hanqaltaag iyo sugi waa ayey u ahayd inanka ayaamahanba ololka jacayl la oo yahayey, maalin, labo iyo sadexba xagiisa ma ayan soo jaleecin isguna intaa wuxuu lahaa: tolow goormay kuu soo jawaabi doontaa;

Waa dhibaato qof lasugahayo oo og in la sugahayo hadana aan soo soconin, dantu waxay ka maaransiinweydey in uu su'aalo jawaabla'aanta warqadii uu udhiibay, asagoo subaxaas ku soo daahay guriga oo ay hortii gashay iskuulka, wuxuuna sugey xiliga bareegga oo uu xaqiiqsanaa in ay dibedda u soo bixi doonto; waxaa dhegihiisa ku dhacay asagoo sugahayey diyaarna u ah in uu ula afbaxo yartaan uu u qabo boholyowga baas, hadaba waxaa bilowday soo bixitaan kii arday ayaagoo u soo butaacay sidii tog ay biyo ku soo x rogmadeen, oo iswada garbinaya bagoodii iyo dumarkoodii; Beerlula sidii caadada u ahayd gadaaal ayey ayar ka soo baxday aydoo adimada si hanaanleh u qaadaysa Mooge markii uu arkay ayadoo iridka ka soo baxday ayuu sare uga istaagay halkii uu fadhiyey, kana hortegey oo ku yiri: abbaayo waan ku salaamay.

Beer lula oo aad u xanaaqsan ayaa ku jawaabtay: warsalaantu ha kuu dambaysee sheego waxaad rabto!.

Abbaayo maxaad iigu soo jawaabi weydey, soow warqad kuuma aanan soo dirin?

Waryaa waa wiilka aniga ha iila imaanin waxa aad sheegayso ee shaqo yeelo, miskiin sigaar gata ayaad tahaye maxaa jacayl iyo wareerkiisa ku geliyey. Aniga oo miskiin ah oo aad aragto in aan ku jeclaado ma ceeb?

Miskiin baad tahay garo dantaada, anigana waqtiga ha iga qaadin, adigana ha is haraadinin, tu kujeclaanaysa ma aan ihi ee yaan laygu kaa sawirini hortayda ka wareeg oo raadso asaagaa, ooy weliba goobtii kaga dhaqaaqday.



Mooge dhulkii ayaa la wareegay aduunyadii ayaa ku madoobaatay, cid uu maciinsado ayuu waayey wuxuu dan moodey catow, wuxuuna ku yiri iyadoo ka sii socota: koley aniga oo aan kaa hari doonin waxaa wanaagsanaan lahayd in aadan goobta iiga dhaqaaqin ee kaalay walaaley, kaalay abbaayo!

Asaga oon garanayn waxa afkiisa ka soo baxaya ayuu soo dul istaagay gaarigiisii oo ay sadex ilaa afar dultaaganyihiin oo doonaya in ay wax ka iibsadaan, asagoon la hadlin ayuu laalaabtay alabtiisii.

Sucaad oo ka mid ahayd dhalinyarada ay isku fiicanyihiin Mooge ayaa la hadashay oo ku tiri: Mooge anagaa ku kor taagan ee maad wax naga gadatid? sucaadey anaa lacag kaa jecel, maantana waan wareersanahay oo waxaan kala garanaayo ma jiraan ee iga raali ahaada intuu yiri ayuu riixdey gaarigiisi.

Bile oo ka mid ahaa ardaydii la joogtey ee ku qososhay dharaartii hore ee uu indhaha la raacay hadana arkaayey markii uu la taagnaa beerlula ayaa ku yiri dhalinyaradii la joogtey: yarku wuxuu jecelyahay gabadha timaha dheer ee dhigata fasalka sideedaad (B) wuuna ku waalanyahay, mashaakilkaas ayaa haysta miskiinka.

Waan ka xumahay wallaahi ayey tiri sucaad, yarku aad ayuu u fiicanyahay oo ma jecli in ay dhibaato soo gaarto haday wax iga yeelayso waan kala hadli lahaa, taasi waa mid kibir badan aqoon fiicana isuma lihin.

Moogena wadada ayuu si toos ah u qabsaday kadib markii uu ku guuldaraystay Beerlula, waxay ahayd maalin uusan soo marin ebidkii mid ka alafsan oo ka tiiranyo badan, asagoon taagero iyo taag midna haayn ayuu ka galay aqalka iridkooda, Muumino guri...

Waa dhibaato qof lasugahayo oo og in la suga ahayo hadana aan soo soconin, dantu waxay ka maaransiinweydey in uu su'aalo jawaabla'aanta warqadii uu udhiibay, asagoo subaxaas ku soo daahay guriga oo ay hortii qashay iskuulka, wuxuuna sugey xiliga bareegga oo uu xaqiiqsanaa in ay dibcdda u soo bixi doonto; waxaa dhegihiisa ku dhacay asagoo sugahayey diyaarna u ah in uu ula afbaxo yartaan uu u qabo boholyowga baas, hadaba waxaa bilowday soo bixitaan kii arday ayaagoo u soo butaacay sidii tog ay biyo ku soo x rogmadoen, oo iswada garbinaya bagoodii iyo dumarkoodii; Beerlula sidii caadada u ahayd gadaal ayey rayar ka soo baxday aydoo adimada si hanaanleh u qaadaysa Mooge markii uu arkay ayadoo iridka ka soo baxday ayuu sare uga istaagay halkii uu fadhiyey, kana hortegey oo ku yiri: abbaayo waan ku salaamay.

Beer lula oo aad u xanaaqsan ayaa ku jawaabtay: warsalaantu ha kuu dambaysee sheego waxaad rabto!.

Abbaayo maxaad iigu soo jawaabi weydey, soow warqad kuuma aanan soo dirin?

Waryaa waa wiilka aniga ha iila imaanin waxa aad sheegayso ee shaqo yeelo, miskiin sigaar qata ayaad tahaye maxaa jaaayl iyo wareerkiisa ku geliyey. Aniga oo miskiin ah oo aad aragto in aan ku jecladO ma ceeb?

Miskiin baad tahayo garo dantaada, aniganа waqtiga ha iga qaadin, adigana ha is haraadinin, tu kujeclaanaysa ma aan ihi ee yaan laygu kaa sawirini hortayda ka wareeg oo raadso asaagaa, ooy weliba goobtii kaga dhaqaaqday.



Mooge dhulkii ayaa la wareegay aduunyadii a yaa ku madoobaatay, cid uu maciinsado ayuu waayey wuxuu dan moodey catow, wuxuuna ku yiri iyadoo ka sii socota: koley aniga oo aan kaa hari doonin waxaa wanaagsanaan lahayd in aadan goobta iiga dhaqaaqin ee kaalay walaaley, kaalay abbaayo!

Asaga oon garanayn waxa afkiisa ka soo baxaya ayuu soo dul istaagay gaarigiisii oo ay sadex ilaa afar dultaaganyihiin oo doonaya in ay wax ka iibsadaan, asagoon la hadlin ayuu laalaabtay alabtiisii.

Sucaad oo ka mid ahayd dhalinyarada ay isku fiicanyihiin Mooge ayaa la hadashay oo ku tiri: Mooge anagaa ku kor taagan ee maad wax naga gadatid? sucaadey anaa lacag kaa jecel, maantana waan wareersanahay oo waxaan kala garanaayo ma jiraan ee iga raali ahaada intuu yiri ayuu riixdey gaarigiisi.

Bile oo ka mid ahaa ardaydii la joogtey ee ku qososhay dharaartii hore ee uu indhaha la racay hadana arkaayey markii uu la taagnaa beerlula ayaa ku yiri dhalinyaradii la joogtey: yarku wuxuu jecelyahay gabadha timaha dheer ee dhigata fasalka sideedaad (B) wuuna ku waalanyahay, mashaakilkaas ayaa haysta miskiinka.

Waan ka xumahay wallaahi ayey tiri sucaad, yarku aad ayuu u fiicanyahay oo ma jecli in ay dhibaato soo gaarto haday wax iga yeelayso waan kala hadli lahaa, taasi waa mid kibir badan aqoon fiicana isuma lihin.

Moogena wadada ayuu si toos ah u qabsaday kadib markii uu ku guuldaraystay Beerlula, waxay ahayd maalin uusan soo marin ebidkii mid ka alafsan oo ka tiiranyo badan, asagoon taagero iyo taag midna hayn ayuu ka galay aqalka iridkooda, Muumino guri

dhexdiisa fadhida oo khudaar jarjaraysa ayuu u galay, markii ay aragtay Mooge oo dultaagan oo ayan caado u ahayn goorahan oo kale soo gurya noqosho, hadana dusheeda taagan waxay dareentay in uu jiro wax uu ka qarinahayo waxayna weydiisey su'aalahan: hooyo waabad jirrantahaye xagee lagaa hayaa? Hooyo wax xanuun ah oo aan kuu sheegto ima hayaan, laakin caajis ayaan tabcaan la ahay ayaamahana wax wa naga gataan ma jiraan ee suuqa waan iska fadhinaa. Moogow maalmahan ma fiicnid oo habeenkii kulay ku tahay waad qarowdaa ee sheeg waxa ku haya waxa aad qarsato waa ku qarsadaane

Hooyo wax aan kaa qarsanayo ma jiraan hadaan qarwana waxaan ku qarwaa dadka faraha badan ee aan ku kulano suuqa, wax cudur ah oo igu soo kordhay ma jiraan hadaan been la sheegayn Anigu kuuma bogin ayaamahan waxaana u malaunayaa in dad lagaa gaaray ee habartaa duq jimco ee deriskeena ah ee dabqaadka wax ku fiirisan kuu geynayaa, oo sidan kuguma fiirsan karo, adiguna waxba iskama ogide habeen kasta waad qarawdaa ee ma intaad dharka ka cararaysaan kusugaayaa (bismilaahi).

Keligeed iydoo isla buuqaysa ayaa waxa maqashay duq culumo oo ay deris ahaayeen waxgaradna ahayd intabadana fadhiyi jirtey bersadda guriga, markaas ayey u dhawaaqday oo ku tiri Muumina balkaalay.

Muumino intay soo kacday oo ay u timid duqdii ayey ku tiri eedo Culimo maxaa daran?

Waxaan rabey in aan ku iraahdo Maxaa ku dhacay maanta madigaagi ma jiranyahay?

Ruuxaan wax kuu sheeganayn maxaa laga garan meesha laga hyo, habeenkasta wuu qarwaa, markastana waa isku buuqsanyahay, raashinkiina labadaan beri waa ka go'ay marka wax aan sameeyo garanmaayo, marka habartaa duq Jimco ah



ayaan isleeyahay dabqaad uga soo geli il inay haysaan u malaynayaa. a;aah, sidaan ha ku dhawranin ma cid kale oo aan isaga ahayn baad haysataa, madigaaga ilaahay ha kuu dhaafee.

Mooge sheekada ay hooyadii duqda kula sheekaysanayso si wanaagsan ayuu u maqlaayey, wax dhadhan ahna uma aanay lahayn mana ayan ahayn mid xal u noqonaysa arrinta qotada dheer leh ee waayadan dambe uu la taahayey; si halhaleel ah ayuu dharkii isaga saaray isagoo oo isku xooray sariirtii oo maciin moodey ku qabashada barkinta Beerka boholyoowgu basanbaasiyey, maxay ka qabanaysaa habar luubaan shidda qof uu boggiisa jacayl Buul ka samaystay oo boholyow la haraadsan, cid uu maciinsado iyo jaho uu beegsado toona aan garanayn; allow yaa kuwan u sheega in aan la fikirahayo sidii aan u xalin lahaa, arintayda murugsan iyo jacaylkayga irdaha loo soo xiray ee aan arxanka lahayn; iyaguna waxay ka sheekaynayaan habar fooxley ah iyo xaalkeeda waa maan barey iyo maan barow waxa ay wadaan, afkaartaasi waxay ku meereeysaneysey Maanka Mooge.

Marna kuma uusan riyoonin kumana uusan fikirin in uu hooyadii uga sheekeeyo Jacaylka gabadhaas si ayna tiiraanyo ugu noqon islaantaan aan awooda u lahayn in ay wax ka qabato xaaladiisa murugsan sababtoo ah waa haween weliba sabool ah oo tiiraanyo mooyee wax kaloo ay u kordhinaysaa ayan jirin, marka wuxuu door biday in uu isaga aamuso, haday weydiisana uusan waxaba u sheegin Muuminana ilaan waa beer wax dhalay hadana waa ku keli, baqdin baa ilaahay saaray beerkeeda oo intay u timid bay ku tiri:

hooyo inakeen aan habarjimco aadnee.
Hurdaa ihaysee iska kaydhaaf habartaa iyo foo-xeeda midna ma rabee.
maya, maya hakayaabin in aan sidaas kugu fiir-sado ma intaad dhimataan sugayaa, hada tagsi miyaan kuugu yeeraa mise waad soconkartaa?
Anigu waan caafimaad qabaa ee arinta saa ha u sii buunbuunin, tagsi iigu yeerimayside anaa cagahayga ku soconaya.

Haweenaydii iyo wiilkeedii waxay isu raaceen gurigii habar jimco oo aan sidaa uga sii fogyn aqalkooda, duqdaas oo ay ku kulmaan agteeda h-aween aad u farabadan ooy mid kastaba ula tim-aado sheegasho u gaar ah iyo arimo ay isleedal hay wax ka ogow, marka ma dhacdo in agteeda dad laga waayo inta badan, Mooge iyo hooyadii ayaa maanta iridka ka soo galay oo gacanta wada mariyey dhamaan haweenkii gogosha fa dhiyey, k-adibna dhankooda ayey ka fariisteen iyagoo su-gahaya inta duqdu uga soo gacan bannaanaanayso , ayadoo markii horaba hab baaq ah u tiri fari-ista oo isuga, muddo aan toban daqiiqo ka bad-nayn ayey sugaayeen si ay duqdu uga faraxalato dadka iyaga ka soo horeeyey ee fadhiya waxaa la gaaray markii iyaga loo fiirin lahaa dabqaadka oo wax uun looga sheegi lahaa xaaladdda, run iyo been midkay doonto ha no otee,hadaba habar jimco ayaa ku tiri: kaalaya hortayda soo fariis-ta; Muumino intay wiilkeedii gacanta soo qabsatay ayey soo hor fariisisey duqdii aydoo u cadaynaysa xaaladaha ay kala kulantay wiilkeeda ayaamahan dambe, waxayna ku tiri: ceddo maalmahan dambe wi-ilka waan ka yaabanahay oo waxaan ku arkay waxy-aabo aanan horo ugu arki jirin, marka waxaan doo-



nayaa in aad dabqaad iigu fiiriso.
Waxaa laydinka rabaa laba boqol Sh;So. oo ujuur ah. Muumino labadii boqol ayey habartii gacanta ka saartay; Habartii intay lacagtii qaaday oo ay dabqaadkii ku wareejisey ayey intay foox ku rid tiri aydoo la hadlaysa fooxeedii iyo dabqaadkee-dii; ilaahay baan kugu raarsheye been ha ii shee-gin, ujuuradaadi wataase, intay lacagtii kor u q-aaday; oo wiilkaas meesha laga hayo cadee, hadii kale dib dambe kuu fiirinmaayo; marka iyadoo si wanaagsan u fiirinaysa qiiqii dhexdiisa oo aad m-oodeyso in ay wax uga muuqdaan ayey sheegtay in subax asagoo meel qashin qub ah maraya uu jini fadhiya dulmaray, kadibna wuxuu damcay in uu dha-rbaaxo, markuu gacanta u qaaday ayuu ka sio oosh-aday, marka dabayshii ayaa martay.
Muumino intay soo hinqatay ayey tiri: maananagaran in wiilka meel laga hayo! khaliifo maxaa u sadaqo ah?
Waxaa u sadaqo ah Orgi cad oo shey cad lagu cun-hayo,
Eedo orgiga waan gartaye sheyga cadi muxuu yahay. Waa bariis iyo caano ay cunayaa haweenka da'da w-aweyn ee deriska ah, Maalin Arbaco ah.
Ilaahayow magantaa, waan filahayoy wiilku inuusan qumanayn, waxaa fiican qofka kula nooli in uu kur-sheegto dhibaatadiisa oo sidan oo kale yaarkay o maqlay; Muumino intay wiilkeedii gacanta qabsatay oo dadkii meesha joogey macsalaamaysey ayey ka b-axday aqalkii habar jimco; markii ay banaanka u bexeen ayuu wuxuu mooge ku yiri aniga jini iyo i-nsi, habar jaan, wax ihaya ma jiraan oo yayna ku waalin habartaan, fooxa dadka ku dhumisa.
Afkaaga ka leexi khaliifadda, weligeedba! ! ! !

been laguma sheegin, anaaba og oo mar horaan gartay waxa ku haya.

Moogaa intuu muunsooday qalbigiisa ka yiri: wallee waxa ihayaan orgi cad, wan galaalan iyo diiq madow midna ku daawoobin!ma nin uu jacayl wareeriyey ayey habar wax sheeg ah iyo dabqaadkeedu wax u tarayaan.
Aqalkoodii ayey soo galeen waxayna kula kulmeen Mooge saaxiibkii Nuur oo fadhiya daarada sugahayana soolaabankooda, wuxuuna ku yiri: bal ii warran sidee tihiin.
Nabad hooyo, waxaan maalmahan garanla'ahay Mooge waa socdaa mana fiyooba,
Haye mooge xagee lagaa hayaa; warninyohow xanuun ima hayo ee duqdaanaa i waalaysa, Jinni iyo waxbay sheegeysaa, ana caajis mooyee wax kale ima hayo, hadda waxay iga keentay habar fooxley ah waxaana kuhaya dabayl jin kulahaa.
Hooyadaa caafimaadkaaga ayey rabtaa ee waxay ku farto yeel; iska dhaaf wax kale e aan ku gawraco haday i dhahdo ka diidi maayo.

Nuur iyo Mooge debedda ayey uga soo baxeen aqalkii waxayna tageen baar Hodon halkaas oo uu Mooge ugu soo bandhigay saaxiibkii Nuur xaqiiqada arintiisa iyo in ay xaaladda qodadeedu ka dheertahay Jinni iyo arimo noocaas ah, Balse uu hayo Jacayl wareeriyey haalmahaan dambe oo u diiday jiif iyo joog, wuxuuna ku yiri Nuurow aduunyadu mashaakil, waa masiibo badan waagii baryaba wuxuu kuula baryayaa weji cusub, yartii maalinkii sow garanmaysid?
Ma xasuustee tey ahayd? waa yartii aan maalinkii warqada u dhiibahayey. haa, haa waan gartay oo ma tii baad weli daba socotaa Moogow?
Daba socod iska dhaafe ayada la'aanteed wax cad iyo wax madow wax ii dhadhamaaya ma jiraan.



Mar hore waan kula taliyey, hadana waan kula talinayaa ee gabadhaa iska dhaaf hadaad wax iga maqlaydo.
Saaxiib hadda talo ma hayo ka harna talo ii noqonmayso oo kama hari karo ee hawshan igu balaaratay halkii aan ka geli lahaa ii sheeg, hadaan saaxiib nahay, maanta arintan wixii aad.ka qaban karto igala qabo anoga mar iyo gacan waad igu gacan sayrtaye.
Nuur ayaa intuu fikiray hoosna u foororsaday dhulka xariiqay, muddo markii uu aamusnaa ayuu ku yiri: Moogow dookhaagu yaab badanaa, adoo sabool ah oo ay hooyadaa agoonimo kugu soo korisay wax hanti ah oo aad haysataana ayna jirin, gabar reer hodon ah ka dhalatay oo aadan diriceeda oo kelya iibin karin, oo weliba aan ku ogolayn haday ku ogoshahay waxabayba ahaan lahayd oo taakulaan ka heli lahayn, iyadiiba haday ku diidantahay si aan wax yeelno garanmaayo, balse aan wax kula qabtee sidee wax yeelaa?
Anigu talo ma hayo ee adigu ra'yi keen.
Sucaad baan derisnahay, Naagna naag baa loo diraaye inakeen aan raadinee.
Walaahi waa talo fiican ee ina wadi!

Waxay aadeen gurigii sucaad oo aan sidaa uga sii fogayn meesha ay fadhiyeen, hadaba Mooge ayaa nuur weydiiyey su'aashan Nuurow sucaad cideeda aqoon ma isu leedihin? Waan isnaqaanaa oo ilaa caruurnimadii ayaan isla ciyaari jirney.
Waxaan islahaa amaad weydaan cid idiinku yeerta ama aad weydaan marka aad gurigooda tagtaan. Markii ay soo gaareen gurigii Sucaad nasiib wanaag waxay la kulmeen aydoo nasra oo ka timid xaafadda kaaraan saaxiibteedna ah la taagan banaanka; Mooge i-

iyo Nuur baa salaamay labadii hablood oo la sh-eckaystay, sheeko aan sidaa u sii badnayn iyo k-aftan labada dhan aan waxyeello u geysanayn, m-arka sucaad ayaa su'aashay oo ku tiri: Nuurow maanta waad soo dheeraateen, qof aan weligii i-maanina waad keentay?
Haa oo sucaadey adaan dan kaalahayn.
Waayahaye barasha wanaagsan yartan Nasro ayaa layiraahdaa, Nuur iyo Mooge, aydoo hadalkeedi sii wadata waxay u sheegtay wiilashii in ay ... Nasro doonayso tegitaanp sidaa darteedna ay ... sagootinayso, si ay dabka uga raacdo Baabuu-r geeyah ceel gaab, iyadoo ka raali gelinaysa labadii wiil muddada yar ee ay ka maqnaanayso ; daqiiqdo kama aysan soo wareegin markii ay u timid aya oo ku sugahaya halkoodi, waxayna ku tiri soodaaya waxa aad aniga ii wadeen ee aad ila raadineyseen, koley wax fudud ma ahee!
Nuur baa ku yiri ariin qalafsan baa sucaadey na haysata, waxaana rabnaa wax awood ah in aadan naga hagranin.
Bal iisoo bandhiga hadii aan karo waan dadaala; ayaa.
Mooge ayaa wuxuu jeeelyahay yarta beerlula la yiraahdo ee timaha dheer, waxaba kaa qarsan maynee dhawr jeer ayuu ku guuldaraystay intuu u bandhigay arintiisa, marka naag naag baa loo diraaye noosoo qabo yartaas.
Sucaad oo arinta hore ula socotey ayna maqalk-eedu ku cusbayn, horeyna uu bile ugu sheegay a-yaa intay dhabana gacanta sa..rtay ku tiri: gab-adhaasi way santaag badantahay, aqoonfiicana is suna lihin ee tukale in aad ii dirtaan baa ii reenaan lahayd, hase ahatee waan isku deyayaa



waxaanse ka baqayaa in ay wejiga iga fiiqdo. waa runtaa laakiin Moogaa jeeele maxaan sam... aniga naftaydu hadda ka hor waan ku gacan ... maanta se maae aan wax kaga diido garanmaayo, xuu taaganyahay meel halis ah, sidaa darteed ... in aan isku daynaa sidii aan wax kula qaban ... yn intii tabarteen ah.
Aniga diyaar waxaan u ahay in aan yeelo wixii ... ifartaan dhibkasta ha igu ahaatee.
waad ku mahadsantihiin sida biniaadan nimaada ... ee aad u dareemaysaan xaaladda qalafsan ee ila oo gudboonaatay, kumana aanan riyoonin in aan il aa iyo heerkaa gabar jeclaanahayo, hadase ... madowba iyadaan moodayaa, samir qofku waa ku ... daye waa mid aan ku soo dhicin weli maskax..., haday ku soo dhici lahaydna in aan fulinayo u ... laynmaayo, marka umuuraha ilaah baa maamula, ti... sayna noqon doontaa, wuxuuna waa haween oo ... qof oo kala duwan hadii ay hal arin kala ... waxaa laga yaabaa in ay ka soo dhawaato meeshii ay hadda ka hor taagnayd, hadda sucaadey ... kaa war sugnaa?
Berri Bareegga ayaan hadii alle idmo la hal... onaa.

Halkii ayaa laysku macsalaameeyey oo Mooge iyo Nuurna ay dib ugu laabteen Suuqa; ayagoon we-li guriga tegin ayuu gabalkii dhacay, waxayna is-la garteen in ay galaan SHaneemo hoden, waxayna soo goosteen tigidkii ayagoo doonaya in ay f..ri-taan kuraasta hor si ayan qoorta u taagtaan in h-dii ay ka hormaraan dad tomo waaweyn leh ama ka dheerdheer; xaqiiqdii filinka waqti fiican ayey galeen, meel ay si fiican wax uga arkaana way f-riisteen, filinkuna aad iyo aad ayuu ayuu ayuu

u fiicnaa, Nuurna si wanaagsan ayuu ugu ri-
yaaqsanaa, laakiin Mooge se xaalkiisu mauxu-
u ahaa? awal baa layiri ruux meeli u cadahh-
ay meeli ka madow, ee qof ku maansheysan ma-
xabo aan garowsha lahay, ku maararowga fil-
inku ma u noqonayaa mid ilowsiiya mowjadaha
ku soo maaxanaya maskaxdiisa; jawaabtu waa
maya, oo intuu daawanayey filinka qisadiisi
macanayd wuxuu isaguna dhexmaaxahayey hirar
is dabajoog ah, wuxuuna soo baraarugey mar-
kii uu Nuur u sheegay in la soo gaaray hal-
kii ay filinka ka bilaabeen oo ay baxahayaan
Moogana uu u sheegay in uusan la soconin she-
ekada filinku waxay ku saabsanayd oo uu ahaa
nin u fadhiya kurisga dushiisa sidii sawirkii
oo kale oo uu ku yiri: been kuu sheegi maayo
ee badkalaan dhex galay, Beerlulaan la baash-
aalayey, boqol ka rooh baa ii bidhaamaysey,
qalbigaan bukaa marba been igu abuuraayey,
bartaydaad aragtaaye booska waan ka maqanaa!

Waa xaajo aad u culus waxa aad sheegeysi-
ide ee ina wadi aan guriga ku geeyee yaadan
dhaafine,.
Waxaan kaa codsanayaa Nuurow in aad ka qariso
Hooyaday arrintaan, waxaan ka baqayaa hadii
ay ogaato in ay qarracanto oo ay raadsato ga-
badha aabeheed waana ku fashilmaynaa xaqiiqdii
ha kayaabin taas marna, lagama yaabo in aan u
sheego hooyadaa.
Ayagoo hadalkii haya ayey iridda ka soo galeen
aqalkii mooge waxayna kula kulmeen Muumino oo
weydiisey ilaa iyo intii ay ka maqnaayeen me-
esha ay jireen, oo ay u sheegeen in ay filin
daawanahayeen, kadibna casho ayey u keentay
markii ay cashadii cuneen oo ay xoogaa sheekaye
steen ayuu Nuur u sheegay in uu ka tegaayo oo
intuu istaagay yiri; eedo waan sii soconayaaye
nabad gelyo.



Nabad gelyo.
Nabad allaha ina wada yeelo hooyo ee sii
soco.
Moogana intuu istaagay ayuu horey u sii
sagootiyey ilaa leemiga, kadibna Nuur ba-
a intuu istaagay Mooge ku yiri: Mooge isk-
a noqo anigaa sii soconayee yaanan ku sii
fogeynine.
Mooge oo aan riyad xumayn ayaa ku soo laa-
btay aqalkoodii oo qalbigiisa khayr u she-
egaya, asagoo naftiisa ku dhiiri gelinaya
in ay sheeaad war farxad leh berri u keeni
doonto , wuxuna isu qabanqaabiyey jiif as-
agoo habeenkaas hurdo macaan [illegible]exday; riyo
aad u farax gelisay ayuu ku riyooday waxa-
yna hayd riyadii sidan: asagoo buraaqadii
uu beerkiisu jeclaa la baashalaya oo dhul
barwaaqo ah Jooga, isagoo boholyowgii hay-
ey farxadi u bedeshey, isagoo Beer lula
beydkiisa joogto oo ay ubad baashalinayaan
ayagoo dalxiis Janaale u tegey oo ay beer-
lula beeraha Muuska dhexdooda ku dhuumatay
oo uu u dhawaaqayo; dhawaaqii riyada waxuu
ahaa mid baraarujiyey Muumino oo huruda k-
una qasabtay in ay toosiso oo ay ku tiraa-
hdo: Mooge toos, Mooge toos.
Mooge oo aad uga xumaaday toosintaa ay to-
osisay Hooyadii ayaa ku yiri: Maxaad ii t-
oosisay hooyo?
Waad qarweysey oo waxaan islahaa amuu riyo
xun ku riyoonayaa marka sidaa ayaan kuu t-
oosiyey.
Mooge oo aad uga xun ayaa ku noqday hurda-
diisii, isagoo deydeyaya in uu riyadiisii
halkiisii kala qabsado, waase habeenkii x-
alay ahaa oo tegey in uu mar labaad la c-
bsado damaashaadkii beer lula ee khayaali-
ga ahaa.

muumino iyadoo walaacsan oo shaydaanka iska haaraysa ayey seexatay horeyna uga yaabanayd qarowga uu la yimid inankeedu ayaamahan dambe; Moogena wuxuu ku soo barbaarugay warkii lixda iyo barka aroornimo ee raadiyo muqdisho, wuxuna isu diyaariyey in uu u baxo suuqa oo maanta xiiso gaar ah u leh, wuxuuna ku yiri Hooyadii; waan baxayaaye iigu soo dhaqso quraacda,

Muumina inankeeda waxay u keentay quraacdii wuxuuna u cunay si dhaqsi ah, asagoo ka baxay isla markiiba guriga, waddada ayuuna cagta saaray, asagoo aad u farax san niyadiisan guul u sheegaya, markastana soo xusuusanaya riyadii xalay oo uu rajeynayo in ay rumowdo, waxuuna soo ga ray goobtii uu fariisan jirey ee uu kula kulmi jirey saaxiibkii Nuur, halkaas oo uu kaga sii horeeyey Nuur, wuxuuna ku yiri: Subax wanaagsan Nuur; aroorya suuban Mooge.

Ma gudubtay Beerlula mise waa dambaysaa?

Daqiiqado ka hor bay gashay iskuulka, iyadoo bilicdeeda qorax soobaxday noodo, been allaa caayayey suurad haween yarta rabaa siiyey, cid inkiri kartaana ma jirto laakiin gaabka nco dhexeeya waa adoo faqiir ah iyo aydoo aabaheed hodon yahay waxaa fiicnaan lahayd in ay iyadu ku jeceshahay, Jacaylkeeda ayaan wax kasta ku heli lahayn, hadana wixii alle ka dhigo ayey noqondoontaa.

Nin weyn wadkiisa waa yaqaan ee Nuurow waxaan ka yaabaya hadaan tan waayo in aan iilka beegsado ama ay waxyeelo kale oo weyn isoo gaarto.

Jacaylku waa jiraa Moogow, cid inkirikartaana ma jirto, mana aha wax sidii xanjada lasugu dhedhejiyo ama loo cabo oo loo dhamo sidii caanihii



waa dareen nadiif ah oo qif kasta ku beeran, hoorar ayuuna kala leeyahay layaabna ma lihid in aad u sheegato ilaa iyo xadkaa, marka qofka lajeceIyahay haduusan ahayn xilkas garanaya dhibka haysta qofka kale mashaakil weyn ayaa ka imaanaya oo aan la furdaaminkarin.

Meeshoodii ayey iska gadaneyeen alaabtoodi ayagoo isha ku haya iridka iskuulka; waxaa la ga ray sa bixitaankii ardayda, labadii gabdhood ee ay isu direen midkoodna ma soo bixin, sucaadse balankeedu wuxuu ahaa in ay la kulanto beerlula xiliga laroogga, xaqiiqddiina way la kulantay oo markii uu gambaleelkii dhacay ayey si degdeg ah uga soo baxday fasalkoodii oo ay beerlula oo aan weli ka bixin ku soo gaadhay, waxayna ku tiri: abbaayo ma agacaagi soo beer lula ma ahayn?

Haa walaal waad saxantahay.

Abbayo anigana sucaad baa la'iyiraahdaa ee baraaj-o wanaagsan; waxaa iga kaa soo gashay dan yar oo aan doonayo in aan ka wada hadalo hadaan waqti haysanaayo adoo raali iga ah.

Balsoodaa aan maqlee.

Waxaan rabey in aan kuu sheegoo nin aad kuu jeceloo kuu dhimanaya, adiga meeyee aan indhokale lahayn, run ahaantiina ah wiil aan la heli karin, anigu waxaan qabaa in aadan cayrin, waayo haduu qofku sidaa wax u jeceIyahay halis buuku jiraa marka waaxaan ka codsanyaa in aad iga aqbasho.

Way fileysey in uu yahay qofka ay sheegeyso in uu yahay Mooge; waxayna ku tiri: waa kee wiilka aad sheegeyso?

Waa yarka Mooge ee sigaarka iibiya.

Beerlula oo aad u xanaaqday markii ay maqashay Mooge oo aan ku cusbayn ooy horo ugu ---

ugu gacan sayrtay ayaa ku tiri waxaan mood-aayey in aad qof fiican ii sheegayso, waxaan ka xumahay fikrada raqiiska ah ee aad iila timid, in aad wiil ciyaal luf luf ah ii shu-kaamiso kaama aanan fileyn, marka raali baad iga ahaanaysaa aniga wiil yar oo ciyaala suu-q ah hoosta iga soo gelin maysid.
Mar horaa layiri haween waa indho ku garaadin hadaan kuu sheegi lahaa nin lacagleh ama aad hanti ku filayso sidaa uma aadan ka heleen ee dantaa ragga kala reebta nooyo Mooga wiilna ka-ma ragsana, hantina ilaah baa u haya, maalna w-aa wasakh ee dadnimaa laguursadaaye adduunyo la-ma guursado, marka doqonimada iska dhaaf walaaley wiilka wax la qabo.
Naa aniga waxaadan qaadan lahayn qoorta ha ii gelin.

Sucaad baa intay xanaaqday si kulul ugu jawaabtay oo ku tiri: ma astaahishid in lagu jeclaado, biniaadanimana ma taqaanid, heer n-aftiisa labadbaadiyo ayuu taagan yahay ee wa-khti lagu jeesjeeso ma joogo ee waxaan ku le-eyahay yuusan nabsi ku qabanine maantaad wax qaban kartaaye miskiinka garab istaag, hadii kale goor ay talo faraha ka haaday baad tebi doontaa.
Gabaryahay intaa noogu ekee sheekada, oo had-aad xiiso u qabto adiguba gabar baad tahaye u buuxi booskayga.
Waad khaldantahay waadna isla qumantahay ooo-d iska tag.

Halkii ayaa lagu kala dhaqaaqay ayagoo kala dhintay oo tuna tankale arki karin; Su-caadna intay baxday ayey balamisay Mooge iyo Nuur oo sugahayey, waxayna diiday in ay wax uga sheegto wixii dhexmaray iyada iyo beer lula oo ay ku balamisay in ay galabta u yimaadaan si ay u u sheegto wixii ay kala kulantay;



Waxay is weydiiyeen waxay ugu sheegi weyd-ey natiijadii kulankeeda iyo hawshii ay u direen waxa ka soo baxay, kadibna Mooge a-yaa yiri: maxaan u malaynaa Nuurow Sucaad waatan shuruuda ku xirtay jawaabtii aan k-a sugeyneye? horta moogow qofu war waa i-hoo hayaa wuxuu noqon doonana garanmaayo waxaan filahayaa in iyadda nafteeda shuru-ud lagu soo xiray oo ay doonayso in aan k-a arinsano.
Galabta geeri baa ka dhow, waana arki -doonaa waxa ay la guuxayso, use malay-nmaayo in ay khayr waddo, hadii ay isasoo af garteen, sidan way ka baedelnaan lahay-d, wejigeedana wuu furfurnaan lahaa, waayo farxadi isma qariso oo Sucaad ilama qu-manayn.
Waxkasta waa suurto gal oo Sucaadna ma aha qof fudud oo warka la dhacdhaca, farxad i-yo murugo labada waan filaynaa, mar hora la yiri, dad iyo duurba waxaadan filayn ba-a kaaga soo baxa.

Beerlula aad bay uga xanaaqday Sucaad iyo ninka ay sheegeyso, waxayna la ahayd in layasay markii loo sheegay in uu jecel-yahay wiil sigaar waddada ku gada, waxayna u dhexfadhidey fasalka sidii qof dhegala' aydoon caro awgeed wax fahmaynin, markii ay xiisooyinkii dhamaadeen ee ay ka baxda-y iskuulkii ayadoo aamusan waxayna baabuu-rkii raacday iyadoon wadihii kelmad u dal-licin, markii ay guriga tagtayna qadadii xataa waa ay diidey iyadoo aad moodayso i-n geeri loo soo sheegay, Aabeheed iyo Ho-oyadeedna way weydiiyeen waxa helahay laa-kiin waxba uma ayan sheegin, Faarax oo ah-aa aabeheed kuna curtay iyada wuxuu isku hawlay in uu wax ka ogaado moesha laga ha-yo gabadhiisa kumase uusan guulaysan, waayo

cid yeeshay dhibaato oo ay sheegi karto majiraa
n,sidaas ayay ahayd xaaladdii beerlula;Moogese
markii uu tagay gurigoodii ee uu cunay intii al
le u calfay wuu seexday,muddo aan ka badnayn la
bo saacadood,asagoo aan wali toosin, ayaa waxaa
u yimid Nuur oo aan u baranin in uu seexdo gala
btii;Nuur intuu sariirta xagga madaxa kaga fari
istay ayuu toosiyay Mooge;Moogana intuu sariirt
a dusheeda fariistay ayuu yiri:maanta aad baan
u hurdday,haddaadan ii imaan lahayn ma aana kec
een,hadda wax yar iga raalli ahaw mus qushaan g-
alayaaye.
Muumina ayaa laba koob oo shaah ah u keentay ugu
keentay miis yar dushiis,Nuurna shaahii ayuu isk
a sii cabay intii uu Mooge ka soo dhamaysanhayay
qabayskiisii,kaddibna waxay aadeen gurigii Sucaa
d oo aan sidaa u sii fogayn, ayagoo sii tashanaya
a, waxyaabihii ay ku tashanayeen waxaa ka mid ah-
aa: hadii ay sucaad noo sheegto in ay guuldarays-
atay maxaan samaynaynaa Moogow?
warqad baan qoreynaa oo adigaa u geynaya, ileyn
kuma taqaano oo hadii aad u geyso kugu soo celi-
n mayse;
Ayagoo sidii u sheekaysanaya ayey gaareen grigii
Sucaad waxayna la kulmeen Maryan oo ahyd Sucaad
walaasheed ka yar oo ay su'aaleen in ay joogto i-
yo in kale, waxayna u sheegtay in ay dhar dhaqaye.
so, markaas ayey horey u gashay guriga oo ay u
sheegtay in Nuur iyo wiil kale ay iridka kore u
taagan yihiin; Sucaad intay dharkii ku wareejise-
y Maryan ayey wiilashii u timid, horayna u soo ge-
lisay gurigii, waxayna fariisisey qolka fadhiga,
halkiibayna ugu sheegtay wixii soo dhexmaray iya-
da iyo inantii kaleiyo sidii ay isu af garanwayeen



ayadoo kula talisay Mooge in uu isga haro gabadh-
as, waayo waxay isbidaysaa in ay ka heer sareyso
weliba waxay ku baraarujisey in ay tahay qof kib-
ir badan oo aan qiimaynin bini aadan nimada, dha-
wrina karaamadiisa, marka qofku haduu sidaa yahay
waxaan ku filnayn maskaxdiisa; Mooge oo ahaa qof
uu boholyowgu baabi'iyey arintaasi ugama duwanayn
tuna:ti waran oo beerka kaga dhacaday, waanada ay
u raacisayna ma ahayn mid ilowsiinaysa, kana ba-
abi'inaysa jacaylka ku baahay badankiisa oo dhan,
waxayse sii hurisay ololkii ka shidnaa laabtiisa;
waxay aqalkii sucaad ka soo baxeen isagoo aan la
hadlayn Nuur, Nuurna uusan lahadlaynin Mooge, mu-
ddo markii la kala aamusnaa ayuu Nuur ku yiri Mo-
ogow duulku waa sidaas, oo horaa loo yiri allow
yaayan na jeclaanin najakama karee, oo yayna na m-
cin nalagama karee, cid ay ka amar qaataan oo aan
dookhooda ahayn ma jiro, waxaan filayaa waxay su-
caad ka keeni weydey qof kale oo ka keenayaa in
uusan jirin, qof dhintay baa laga samraaye ruux-
aa ka hadh.
Nuurow qof dhintay waa laduugaa oo dib looma arko
, berri bay hortayda soo mariye, ruuxkuu muuqda
oo maankaagu raacay sidoo looga samraa!
Waayahayex soo qor warqadii aad sheegeysey, anaa
subixii u geynayee; Nuur wuxuu isku deyey in uu
ilowsiiyo murugada haysata saaxiibkii, isagoo ma-
rba sheeko ku maaweelinaya,kadibna waxay baabuur
ka raaceen hakadka Basaska ee Dabka ayagoo u soc-
da ceelgaab ujeedadooduna ay tahay in ay galaan
shaneemo Banaadir oo uu ka soodey filin aad u wa-
naagsan oo Ameerikaan ah, runtii filinkaasi Nuur
AYAA DAWANAHAYEY, Moogese kursiga ayuu dul saarn-
aa oo waxba ma dhaamin , wuxuuna dejinayey wixii
uu ka fali lahaa arinkan, asagoo sidii u fadhiya

ayuu ku baraarugey cadaanta derbiga fiiinka; asagoon yaa kula socdey oraninayuu iska baxay, Nuurna markuu arkay in uu baxay oo iska tegey ayuu ka daba baxay, kadibna wuxuu gaeyey gurigoodii wuuna ka tegey isgoo kula darraay in uu si wanaagsan u soo qoro warqdi berri uu beerlula u dhiibi lahaa; Mooge marki uu casheeyey ayuu diyaarsaday qalin iyo warqad wuxuuna u qoray si naxariisleh, asagoo dareen siinaya jacaylka uu u qabo iyo heerka uu la marayo, in uu kala garan la'yahay Jahooyinkii hilowga uu u qabo dartii oo ay uga ma ciinto xaaladda uu ku jiro, asagoo ugu baqahaya hadii ay diido in uu ka cabsanahayo arrin foolxun oo aan wax ka qabasho lahayn in ay haleesho; habeenkaas oo dhan il iyo baal hurdo isma saarin wuxuuna u ahaa habenka baasdheera, isagoo gadgadoomaya sariirta du sheeda ayey intay hooyadii kacday tukatey salaadii subax, xoogaa markii ay werdiyeysey ayey kacday oo diyaarisay quraacdii; sidii isagoo hurdo ka soo kacay ayuu sariirta dusheeda ka soo booday oo isu diyaariyey inu u boxo suuqa; Saacadu markii ay ahayd todobadii aroornimo asagoo u socda meeshii uu maal mahaan dambe uu sida ba'an ugu heelanaa, haddana uu isleeyahay Nuur baa kusugayee horey u gaar ayan beerlula gelin iskuulka hortaaye, goobtii ayuu yimid wuxuuna kula kulmay Nuur oo u sheegay in uu daahsaday oo ka qaaday warqadii oo u dhiibay Beerlula oo markaas Baabuurkii ka soo degteysey isagoo ka raali geliyey intii yarayd e uu istaajiyey? Nuurna intuu dib u soo laabtay ayuu ku yiri Mooge: Mooge warqadii waa ay iga qaaday laakiin qofkaan arkaayey ilama indhafiicnayn. nasiib xumo waa tan igu dirtay, dookhna waa kan aan kala hari la'ahay, waxaana dhibaatada



ibaday niyadayda aan ka Aamri karin ee Rabi baa xalin doona arintayda.

Beerlula waxba ma ayan furin warqadii ilaa ay gurigooda tagto, waxayse rumaysnayd in uusan qof kale ahayn ee uu yahay Mooge, Markii ay tagtay aqalkoodii ayey la soo baxday warqadii ay ku qornaayeen ereyadii inankii uu jacaylku u diiday jiifka iyo joogaba, cunto iyo cabidba,; markii ay akhrisay ee ereyadii ka kululaa dhimbisha dabka oo ahayd mid aad uga duwan kuwii hore ood aqodayso in ay quusasho ku jirto; waxaase xusuus mudan ereyadii uu ku soo gabagabeeyey oo ay ka mid ahayeen: waxaad go'aan ku gaartay in aad igoydo, aniguna mid sidaa kaaga haraya ma aa ahi, waxaa wanaagsan in lala tashado qofka inta talo iyo taagba uu ahayo, waxaase nasiib darro ah in aad taladiisa u baahatid asagoon wax kuu tarikirin;

Ayadoo marna u fiirsanin ereyadaa catowga ah ee ka soo yeeraya. Mooge, oo waxay jeexjeexday warqadii sidii caadiga u hayd oo ay ku daadisay meeshii ay ku daadinjirtey kuwii ka horeeyey, marka ayadoo aad u caraysan ayey hooyadeed ku tiri: hooyo anigu iskuul dambe oo aan aadayo ma jirto.

Caasho oo ahayd Beerlula hooyadeed ayaa weydiisay waxa sababay in ay tegi weydo iskuulka, oo ku tiri: maxaa ku helay oo u diidaysaa wax barashada?

Wiil xun oo ciyaala suuq ah oo iskuulka hortiisa ku gada Sigaar, ayaan wadada ka mari la'ahay, hadii la'iga reebi waayana waxbarashada oo dhan ayaan uga harayaa.

Oo hooyo Muxuu ku leeyahay?

Beerlula oo arintii u yeelaysa weji kale ayaa ugu jawaabtay intuu iridka iskuulka

ii istaago ayuu igu dhahaa;yareey haddaad ibballanin waydo,wallaahi dhagaha ayaan kugu dhufanayaa.

caashoo aad u xanaaqday markii ay maqashay hadalka inanteeda ayaa ku tiri:hadduu wiil faciis ah ku arki lahaa garabkaaga sidaa kuma yiraahdeen,mar horaan aabbahaa ka waayay,war wiilasha aad adeerka u tahay,mid inooga keen miyigo hadduuse wax ka qaban waayo,haddaan tii ka dhaxda dhageeg far la dhihin wuu arki doonaa!

ayadoowaxa ka yeeraya aad yaabayso ayaa waxa soo galay,Faarax oo ahaa odaygii reerka,asagoon ka soo degin baabuurka ayey ka hor tagtay ayadoo cartameysa, waxaana ka mid ahaa waxyaabihii ay kula hadleysay: waatan gabadhii keligeed aheyd ee inoo joogtey waxbarashadii wey ka soo taagantahay, haddaad ka war heyn lahayd ood tagi laheyd iskuulka, wiil xun oo ciyaal lufluf ah uma istaagi laheyn waddada oo ma yiraahdeen haddaad i ballamin weydiid waan ku dilayaa, darawal danbe gabadheyda geyn maayo ee adaa geynaya.

Faarax runtii markuu arkay kulaylkii caasha iyo waxa ay u sheegatay in lagu saweeyay gabadhiisa aad ayuu u carooday,illeyn horaa loo yiri : rag waran la gilgilay ka maraa, gambbo la gilgilayse ma maro;haddana ay taa jirto kama ayan lumin daganaantiisi wuxuuna xaqiiqsanaa in uu jiro sharci lagu abaal marinayo qofkii gaf sameeya, marja isagoo caradiisii qarsanaya ayuu ugu jawaabay hawecneydiisa: Caasho bal sheydaanka iska naar waad kulushahaye, hadda wax dhaawac ah kuma yaal gabadha gacanna looma geysan, aflagaado iyo waddo u istaag



jid looraaco ayey leeyihiin oo xadgudub qofkii sameeya isgay u taalaa, haduu allaha awoodda lihi ogolaado berri naa ka xaynaya Booliskana ka dacwoynayaa, arrinta xaqiiqadeedana waan soo ogaanayaa, marka jooji buuqa kaa baxaya.

Aniga Faaraxow labo keliya ayaan ka leeyahay Carruur cid inay waxyeello u geysatana ma ogoli ee wiilkaa yarta iiga reeb.

SHeekadaa ilmaha hayga ma qashiinin, intuu yiri ayuu horey u galay aqalkii, kadibnaa dharkii ayuu iska bedeley, wuxuuna galay Musqusha, markaana qadadu waxay diyaar ku ahayd Miis dushii, aydoon qoysku qadeen inta afarta ruux ee qoysku ka koobanyahay mid ka maqanyahay, markii uu odaygii ka soo baxay Musqushii dhamaan reerka oo dhami waxaay diyaar ku ahaayeen qadada dusheeda, maalinkaas waxay qadeeyeen ayagoo kala aamusan, markii ay qadadii dhamaysteen ayuu faarax su'aalay gabadhiisa sida ay wax u dhaceen, aydoon weli afkeeda hadal ka soo baxin ayey hooyadeed warkii ka boobtay oo ay damacday in ay uyadu u sheegto waxa dhacay, waxaase aamusiyey faarax oo u sheegay in uusan iyada waxaba weydiin ee uu su'aalayo gabadha sida uu yahay xaalku; Caasho ayada oo aan hadal dambe soo celin ayey ka kacaday goobtii oo ay gashay qolkii jiifka aydoon caro jirkeeda meel lasaro lahayn; Beerlulana waxay aabeheed u sheegtay wixii ay hooyadeed horey ugu sheegtay ayadoo weliba wax ku dardaraysa; Faaraxna wuxuu ugu qalbi qaboojiyey in uusan mar dambe wiilkaasi fal xun kula kici doonin, oo uu isagu subixii ku kalihi doono Booliska; sidaa ayey Beerlula iyo aabaheed go'aan ku gaareen, balse sow kama wanaagsanayn in ay arinta runta ka sheegto, aydoon miskiinka Jacaylaka la dhiban waxyeelo u geysanin. . .

Mooge isagoo war mooge ah oo isleh to-
low saaka jawaab ma kuu keeni doontaa, ayaa
waxaa agtiisa la joogiyey Baabuur ay uga mu-
uqatay yartii uu jeclaa oo ay la saaranyih-
iin labanin oo uu midkood yahay askeri dir-
eys gashan; isaguna cid baa dacwad kuu qabta
isma uusan lahayn, waayo cid uu waxyeello u
geystey ma jirin, marka intay iyadu farta ku
soo taagtay ayaa waxaa soo degey askerigii oo
u yimid Mooge oo ku yiri: Mooge ma adigaa?
Haa ee maxaa daran?
Soofuul gaariga dacwaa laguu qabaaye.
Oo yaa ii qaba.
Gabadhass iyo aabeheed.

Mooge intuu wax uu ku hadlo garanwaayey
ayuu alaabtii ku dhaaftay Nuur oo uu raacay
dadkii dacwada u qabay,; markii la geeyey
Saldhigii booliska oo ay Beerlula iyo Aabeh-
eed jeedsadeen dacwadoodii, Mooge hadal uu ku
hadlo iska daaye wuxuu ka jeedsan waayey ya-
rta uu jecelyahay ee hortiisa taagan, su'aal
kasta oo la weydiiyana kama uusan jawaabayn
waa yo wuxuu ahaa nin ku maqan qofka muuqiisa
uu muxubadda dheer u qabo ee hortaagan, dhawr-
jeer markii wax laweydiiyey ee uu la hadli wa-
ayey ayey u qaateen in uu yahay nin kibir la'
aamusan, waxaana amar lagusiiyey askerigii
keenay in uu qolka xariga ku tuuro, Askerigii
intuu kabihii ka saaray asaga oo ka xun xiri-
da uu xirahayo inankaasaas ayuu qolkii xabsi-
ga geeyey.

Jacayl miyaa qarsooma? jawaabtu waa maya
waxaa dareemay qaar ka mid ah askartii meesha
joogtey iyo Beerlula aabeheedba, markaa Faar-
ax wuxuu gabadhiisa ku yiri: aabe yarku ma
qumana ee maxaa ku dhacay, adiga uun buu ku-
gu maqanyahaye?
Wuxu miyir ma qabo waxaana u malaynayaa in



uu ii fiirinayo ciil uu ii qabo.
Xaajadu intaa aniga waa igala qodo dheert-
ahay.
Ayagoon weli ka bixin Saldhigii ayey soo
gashay Muumino oo intuu Nuur u tegey arin-
ta sal iyo baar oo weliba soo raacay kadi-
bna tusiyey Beerlila iyo aabeheed,; aydoo
kulaylka ka baxahaya xabad sigaar ah laga
shidankaro korkeeda, ayey hor istaagtay
Faarax oo ku tiri: wiilkayga ninka xiray
ma adigaa?
aniga weeyaan.
aad xidhide maxaad ku xidhay?
Faarax ayaa si degan ugu jawaabay marka
uu arkay islaantu sida ay u kulushahay oo
oo ku yiri: Gabadhaas ardayada ah ayaa ka
mari weydey waddada.
SHukaansigu xumaato ma aha, oo waa gabar
geyaankiis ah haduu jeclaaday oo uu ku yi-
ri waan ku jeclahay ma waddo u istaagbaa
mise xumaatuu ku sameeyey, hadii ay jirto
wax dembi ah oo uu galay cidna uu u geyst-
ey waa lagu soo eedaynkaraa, laakiin hada-
ad leedahay gabadhayda lama shukaansan ka-
ro muxajabad ka dhigo, wiilkaygase banaan
cidlo ah in aad ku soo xirato waa gardaro
sharcigaha waa u simanahay, intaas in he'-
eg oo gardaro ah hadaad nagu hesho ha noo
dhaafin.
Faarax intuu soo waday Muumino oo uu geey-
ey Xafiiskii ayuu yiri haloo soo daayo wi-
ilkeeda,kadibna wuxuu yiri isagoo la hadl-
aaya Muumina: walaaley gabadhaasi waa soo
sheegatay waana haween, marka waxaan idin-
ka codsanyaa adiga iyo wiilkaaga in ayan
mardambe idinka soo sheegan oo adaa hoo-
jdiis ahe la hadak wiilkaaga.
Muumino markii ay aragtay [illegible] Faar-
ax ito

ax iyo xilkasnimadiisa ayey ilowdey wixii caro
ahaa oo hayey, markaas ayey ku tiri; haduu ga-
can iska dhaafe kelmad xun yiraahdo anigaa iri,
isaguna na oran , laakiin xaal dhalinyaranimo
yaan kumaato loo qaadan.

Waxaa wanaagsan hadii ay dhibsatay xaalka dha-
linyaro inuu iska dhaafo, waayo ayduna waa ga-
bar, isaguna waa wiil, labaduna waa caruur, m-
arka is afgarad hadii uusan jirin khaladaad badan
dan baa imaanaya, hadhow wixii dhib keeni lahaa
hadda in laga wada hadlaa fiican, waxaan idinka
codsanayaa marlabaad in aad gabadhaan ii amaan
celisaan, aniguna marna u malayn maayo in aan
wax xad gudub ah qofbiniaadan ah u geyso islee-
yahay, idinkana waxaan idinka rajeynayaa in aydan
igu xadgudbin.

Walaal anigu ma jecli in gabadhaada wax loo geys-
to sida aanan kayga u jeclayn in wax la veelo,
marka waxaad ku qalbi sana taa in aysan xaga-
naga xumaato kaaga imaanayn.

Faarax iyo muumino waxay mid kastaaba gaganta
qabsadeen kii uu dhalay ayaguu isu qalbi san
oo wax dhibaato ah kala tirsanayn, gacantana is
celiyey, midba midka kale ka raali geliyey bal
hadii ay jirtey wax xumaato ah oo uu u qabo, Mo-
ogese aad ayuu u ya banaa sababtoo ah wax xumaato
ah oo uu sugahayey in lagu soo dacweeyo ma aysan
jirin, waxaase isweydiin leh maxaa iska bedeley
fikradiisii uu ka qabey Beerlula?

Jawaabtu waxaa weyse: waxaa sii kor dhay jacaylkii
uu u qabay, waxayna sii fogeysey warankii wadna-
ha kaga taagnaa, wuxuuna go'aan ku gaaray in uu
berri subaxdii u geeyo warqad kaleoo uusan sidaa
caga harin, maxaa yeelay diidada badan iyo ku gac-



can sayrku waxay sii huriyaan dabka jacaylka wax-
ayna kordhiyaan Boholyowga qofka; hawshiisii ma-
almeed markii uu dhamaystay oo uu ku noqday guri-
gii ayey Muumino kala hadashay xaalada yartaa Ma-
anta loo xiray awgeed, waxayna ku tiri: aniga in-
taan lahaa orgi cad u qal diiqmadow u raadi, hab-
ar dabqaad uga fiiri, foox ha looshido, sheydaan
ha laga eego, maxaad iigu sheegi weydey in uu ja-
cayl ku hayo intaanan lacagta iska dhamayn'.
Adaa iswaalahayey mooyee anigu waan kuu sheegay
in aanan jiranayn, hadana wax dhib ah oo uu jaca-
yl igu hayo ma jiraan, gabdhana waa la shukaansa-
daa yartaana dhaafi maayo wax kasta haduu dhaco,
wax khalad ah oo xodxodasho dhaafsan ku samayn m-
ayo .

Doodaadi waxay ahayd mid dhex araeysey Mooge iyo
hooyadii; faarax iyo reerkiisina waxaa dhex mart-
ay dood aad u adag, aydoo uu faarax ku eedeeyey
gabadhiisa iyo hooyadeed in ay ceebeeyeen oo ay
faraha u geliyeen wax aan sharaf u ahayn in uu d
dhexgalaa, wiilkaasna uu yahay miskiin aysan su-
urto gal ahayn in uu sameeyo ficilka ay beerlula
ku sheegtay; Beerlula naftooda waxaa u muuqatay
in ay khaldantay, aydoo u aragtay arinta weji ka
duwan sidii hore oo ay garowsatay hadalkii aabah-
eed, waxayna qiratay in ay fududaatay markii ay
arinta heerkaa gaarsiisay, iyadoo xalin kartey k-
eligeed, waxayna dib u xusuusatay khaladaadkii ay
ku samayn jirtey Mooge, waxayna garowsatay in uu
jiro jacayl, waxayna horteeda keentay sawirkii
iyo Muuqaalkii Mooge, aydoo niyadeeda ka dareeg-
maysa in ay u hayso naxariis aad u balaaran, w-
axayna ku dhamaatay doodii iyada iyo nafteeda u
dhexaysey in Mooge gacmo furan lagu soo dhoweeyo
iyadoo ka xun wixii khaladaad ahaa oo ay hore u
geysatey?, oo ay welibe iyada naftoodu

bageheeda ugu tagto, marka ugu horeeya ay is-
kuulka tagto, oo ay u sheegto in ay wax kala
qabanayso jacaylkiisa; hadaba labada dhanba
waxaa ka jirey wada hadaladaas, ayadoo Mooge
an u qarsan gaar a ahayd oo ah: Jacayl gaa-
muray oo aan lahayn cid uga gargaaraysa, oo
ay murugo iyo tiiraanyo, fikir iyo walaac,
guuldaro joogto ah, oo weliba aflagaadho loo
geystaa u dheertahay, mararka qaarkood iyo t-
i ugu dambaysay ee uu kala kulmay tuu jeclaa
iyo aabeheed ay ahaayeen arimo taabanaya isa-
a, asagoo intaa oo dhibaato ah la kulmaya a-
uusan hadana jacalku ka naaqusayn in uu ku
sii kordho mooyee; balse wuxuu qoray warqad
radkii akhriya oo ay ku jirto shucuur bini a-
daninimo uusan ceshan karin ilmadda asagoo
tusuusinaya in uu jiro nabsi aan nagaanayn,
lo uu sugahayo waqtiga uu soo ridi doono, il-
ayn qof aan garanayn waxa ku gubahaya waa guu-
ldaro in aad u gabaydo, waa gacan la'aan in
aad gargaar weydiisato .

Sidii caadada u ahayd wuxuu la soo kala-
bay mooge subaxaas warqadii macaanayd ee ay
ku xardhanaayeen ereyadii sida haqablahaanta
ah uga soo burqaday Maskaxdiisa, ee ay illinta
indhihiisa ka soo dhacday dusheeda ka noqotay
sawirka xusuusta gaarka ah reebaya, asagoo
aad u fikiraya oo socda laamiga dhiniciisa
midig oo ayna jirin wax uu garanhayo oon ah-
ayn afkaarta sida xaddhaafka ah ugu soo dha-
caysa maankiisa ee uu ku alaladayo , ayaa
waxaa si kedis ah ugu dhacay Baabuur iska
mooge ah oo ka soo baxay dhanka' xaafadda hwl
wadaag, baabuurkaas oo si xoogah waddada ku
maaf islahaa inta ayan baabuurkale kugu im-
, waxay maqaadiirtu ku soo beegtay Mooge
isla socda oo wax uu ka warhayo ayan jirin
... Baabuurka jiirada ka soo baxa



Waxaa suurto gal u noqonweydey wadihii Ba-
abuurka in uu ka qabto waayo wuu naxay;
shilkaas wuxuu ahaa mid halis ah oo ay ad-
agtahay ka kicidiisu, marka Mooge oo ay n-
afxile ku jirto ayaa laga qaaday laamiga
dhiniciisa oo lagu qaaday isla baabuurkii
ku galay shika, si loo badbaadiyo dhaawac-
iisa, waxaana lageeyey Isbitaal Digfeer,
asagoo aad u dhiigbaxaya, ruuxdiina waxay
ka baxday shandaqiiqo kadib markii la gee-
yey isbitaalka, asagoo oo digtoor axmad oo
ka mid ahaa takhaatiirtii ugu timid badba-
dada ka qoray dardaaran kana qaaday arjig-
ii uu u waday beer lula oo ugu jirey jeeb-
ka, wuxuuna ula dardaarmay sidan: digtoore
waxaan ahay ninkaas ajasiisi soo xaadi-
rtay ee saaran sariirtii mowdka, una mala-
ynmaayo in aan mudo sii noolaanayo, waxaan
kuu sheegayaa in ay aduunaka igaga dambee-
yaan maanta hooyaday oo aan xaqiiqsanahay
in ay qaracmayso iyo gabar aan jeclahay
anigu iyaduse aan ijeclayn, hooyaday waxa-
ad ku dhahdaa samir maciinso, rabigii ku
abuurayna u noqo isaga ayaa ikaasiiyey ig-
ana kaa qaaday, ku raali noqo qaybta ilaa-
hay iyo qadarkiisa calooshadaana cesho,
bal jeebkayga SHaatiga ka soo saar warqad-
da ku jirta; taqtarkii baa intuu jeebkiisa
gacanta geliyey ka soo saaray warqadii uu
u tilamaamay, wuxuuna isagoo hadalkiisa s-
ii wata yiri: digtoore gabadhii aan kuu s-
heegahayey oo aan warqado badan oo hoere u
qoray tana iyada ayaan u wadey, waadna ar-
agtaa xaaladayda sida ay tahay qof aan ad-
iga iyo aniga ahayn oo ka warqabaana ma j-
iro, wuxuna ahaa arji aan kaga codsanayo in
ay ii soo dabacdo oo ay wax igala qabato
jacaylka aan taagta u waayey, marka hadii

markaa hadii uu nasiibku noqon waayey in uu ii hiiliyo oo aan gaarsiiyo warqadda anoo nool, waxaan kaa codsanayaa in aadan cidna iga siin ando dhintaysee adigu u tala, kaddib markii aan [illegible]daas kuula dardaarmay hadaad qof iga siiso a-akhiro ayaan xisaabtamaynaa :

[illegible]ddibna wuxuu joojiyayay dhaqdhaqaaqii oo dhan, indhihiina kor ayay u rogmeen naftiina way [illegible] a faaruqdat jirkiisa .

[illegible] dhinto waa ilaahay, asagaa abuuray asaguuna [illegible] laabtay, ereyadaasi waxay ahaayeen kuwo kasoo baxayay afka digtoor Axmed oo ka tiiraanyaysan [illegible]digaa laqnaday oo ay ku yaryaraatay adduunyad-[illegible] [illegible] dhan, oo dhaxamooday xilli aynan dhaxan jir[illegible] [illegible] [illegible]agoo waayay cid ka xirta daaaqadihii qolkii [illegible] [illegible] jiray oo dabayshu isku garaacayso, muddo ma-[illegible]rkii uu fadhiyay ayuu dibadda u sóo baxay oo uu u yeeray dad ka fagaada Meydka kuna xereeya Qaboo[illegible] [illegible] inta ay dadkiisu uga imaanayaan.

Muumino waxay weydey madigeedi keli ahaa oo ga[illegible] [illegible] [illegible]eedii ayaa dhacay; Nuur oo warmooge ahaa iskuna [illegible]cd ayaa wuxuu la soo kulmay dad neeshii shilku [illegible] dhacay ku buuqsan, markii uu waraystaynaa wuxuu [illegible]aday qofka dhibku gaaray in uu yahay saaxiibkii Moogo, waxaana ku dhacay argagax iyo naxdin, mudo [illegible]cad ku dhów ayaan afkiisa wax hadal ah ka soo b-[illegible]ih, isagoo illintii indhihiisa ka soo dhacday ay [illegible] oysay shaarkiisa ayuu u tegey Muumino oo aan war iyo [illegible]l midna qabin, markii ay aragtay Nuur oo [illegible]rooranaya waxay xaqiiqsatay in ay mooge wax gaa-[illegible]n, markaas ayey intay fadhigeedi ka soo booday [illegible] ay nuur garabka qabatay ku tiri:-

[illegible] maxaad la ooyeysaa oo ku holay?



Muddo markii ay hadalkaas ku celcelinayey ayuu ku yiri: eeddo mooge baabuur baa jiiray asagoo naf xile ku jirtaana loo qaaday Isbitaal digfeer, in uu dhintay iyo in kalena ilaah baa inaga og.

Muumino dhulkii ayaa la wareegay; aduunyadii oo dhan ayaa ku ciriiryantey, Baroortii iyo qayladii ayey isugu soo baxeen derisyadii oo dhan, haweenkii oo dhan ayaa u baroordiiqay, Hooyoy Hoogayey gacal waayeyey, gabalkay dhacyey, ayey ahayeen erayadii ay ku barooranaysey iyadoon maan iyo miyir midna lahayn, ayey ku qaaday Baabuurkeedii Asli oo ay deris ahaayeen, iyadoo xaaladeeda ilaah uun uu ogyahay sida ay tahay; bal qiyaas haweeney dad oo dhan wiil madi ah ka leh oo oday iyo inan wax u wehcliya aan lahayn oo layiri waa dhintay ama naf xile ayaa ku jirta wiilkaagii sidey kula noqon lahayd? ayadoon garaad iyo xis toona lahayn ayaa la geeyey Isbitaalkii, waxayna takhaatiirtii uga tacsiyeeyeen dhimashada inankeeda iyo in uu ilaahay ka siiyo samir Geeridaa Naxdinta leh ee ku dhacday, waxaana loogu yeeray digtoor axmad oo la joogey intay naftu ka baxaysey; kadibna Muumino waxaa la tusay Maydkiisii oo laga furfuri waayey Muddo daqiiqado ah, dabadeedna wuxuu digtoor axmad u sheegay Muumino iyo dadkii la socday dardaarankii Mooge oo ahaa: in aysan bohin iyo baroor midna wax u soo celinayn, samirkana ay ku gaarayso guul iyo raali ahaansho Illaahay; dantaaba ku sandulaynaysa in ay samirto, waxay barooori u soo celinayso ayaan jirin, waxayna isbitaalkii ka laabteen dadkii gurmadka ahaa ee muumina la socdey ayagoo murugeysan oo la tii raanyaysan islaantaa gablantay, waxayna go'aansad[illegible]

in ay berri sadexda galabnimo aasan; taasi waxay ahayd Muumino iyo xaalkeddi .

Beerlula ayadu ma ayan imaan iskuulka maalinkaas oo ahayd khamiis, aydoo caajis i iskala joogtay, maalinkii dambe ee hayd jimcada ayey soo aaday suuqa aydoo doonaysa in ay soo gado alaabo yaryar oo isugu jirtet qaar iyada gaar u ahaa iyo bar guriga looga baahnaan aydoo alaabtii soo wadata ayey joornaal horey u soo gadatay, mana ayan fiirin waxyaabihii ku qornaaye waxay soo dhexgashatay bacdii ay alaabta ku wadatay, aydoo si hanaanleh u laafyoonaysa ayey soo raacday Baabuur sugahayey, waqtiguna wuxuu ahaa tobankii subaxnimo, markii ay gurigoodii timid oo ay iska bedeshey dharkii ay wadatey aydoo diric keliya qabta, ayey soo fariisatay qolkii fadhiga oo ahaa mid aad u heersareeya oo muujinaya hantidooda, ayadoo wadata joornaalkii, baalashii joornaalka ayey gedgedisay iyadoo marba cinwaan akhrinaysa, waxayse si lama filaan ah indhaha ugu dhufatay, tacsi; Maryan Jaamac.. Maxamad Cali .. Nuur Cali.. Geedi Rooble .. Xasan qalimow.. Aadan Loof .. dhamaan waxay tacsi u dirayaan Jaalle Muumino Xuseen Jaamac oo uu wiilkeedii Marxuun Mooge Madaale ku geeriyooday SHil baabuur oo ka dhacay waddada Kacaanka kasoo horjeedka Boostada Hodon, asagoo watey garigacan ay u saarnaayen sigaar iyo alaabo kale oo yaryar, walina wuxu ku jiraa Qaboojiyaha isbitaal digfeer,waxaan la aasi doona Jimcaha sadexda galabnimo, ilaahayna waxay uga baryayaan in uu ka siiyo samir iyo iimaan saadaq ah, asagana janadii ka wabaabiyo (Aaamin)..

Mudo aan ka yarayn toban daqiiqo ayey hubsanaysay in uu yahay Mooge iyo in kale,



Waxaase u cadaatay in uu yahay isagii; muddo labaatan daqiiqadood ah ayey hadal iyo dhawaaq midna afkeeda ka dhihin, kadibna iyadoo aad mood in uu jinni dardaray ayey intay istaagtay orod ku tagtay Meeshii ay ku daadin jirtey warqdihiisa kadib marka ay jeexjeexdo; jeexjeexyo badan oo meelihii yaala ayey isku qaqabatay, bal inay hesho wax u akhrisma; labay tuurtaa; labakale ayey soo qaadataa bal inay hesho dhawr kelmadood oo isku aaday ayadoo ayan waxaba uga suurto gelin ayeey halkii ka oroday, aydoo aan kab iyo karin midna qabin, timeheedii dheeraana ay dabayshu qaarba meel u wadato, nabsi ma nagaado mana naxariisto ee ay xusuusta ereyaadaas ku yihiin laab dilaac; dhamaan dadkii oo dhan ayaa layaabay gaar ahaan haweenkii iyo caruurtiina way daba yaaceen ruuxan haweenka ah ee siwadan u muuqada, ayagoo ay la ahyd in ay wadan u dhalatay; aydoo huudii iyo hiidii ay ka dhaalatay; aydoo huudii iyo hiidii ay ka dhamaatay ayey tagtay isbitaalkii oo dadkii joogey qaarkood ka cararay, qaarna aad ayey uga xumaadeen gabadha sidan u quruxda - badan ee silicsan; gabar kalkaaliso ah ayey su'aashay meydkii iyo cidda lagala xiriirayo, kalkaalisadii iyada oo aad ugu naxariisanaysa ayey u geysay digtoor axmad oo ay ka warqabtay in lagala xiriirayo meydkaa arintiisa oo nasashadii jimcaha uga haray midaa awgeed, digtoor axmad markii uu arkay xaalada qofkan aad ayey u yaab gelisay, sababtoo ah wuxuu ku yiri mooge anaa jecel ee iyadu ima jecla, wuxuuna qiyaastii filahayey in ay tahay qofkii uu u sheegay Mooge, ileyn Hooyadii wuu arkaye, wuxuuna ... in uu nabsi ... wuxuuna ku yiri: wuu ... sheegay ... feeyo, wuxuuna ku yiri: wuu ... sheegay

Moog(e in ay jirto gabar uu jeclyahay, waqtigii mu himanayeyna wuxuu u wadey arji uu islahaa gaarsiid, nasiib xumose waxaa ka soo hormartay ajnabi jachiisii, waxaan kuu rajeynayaa samir wanaagsan an iyo iimaan suuban. Beerlula oo aad u qalbi x-ab u tacsiyeynta digtoorka aan mid sidaa u s-mirsiinaysa ahayn, laakiinse qabsatay arji buu kuu soo wadeydii oo u ooman aragtida meydka ayaa u tiri: ditoore ma itusi kartaa aan wejigiisa mar qurh aan arkee.

Digtoor axmad ayaa intuu geeyey qaboojiyihiioo u iray tusiyey meydkii, ayadoo ilmaynaysa ayey intay meydka aad u fiirisay tiri: Moogow adigaa istaroogxay oo ka indho qabsaday aduunyadan muru-gadeeda, ifka waad ku dhibtootaye waxaan ilaaha-y ka baryayaa in uu ku durduursiiyo waadiyaasha jana fardowsa, oo ay xuurar cayn ku daadaha-ayso ku ilowsiisa wixii aad ifka ku soo martay, barwaaqayso boqorkaan kuu baryaye, aduunkaan is-ku seegnaye rabiyo aakhro ha nakala habaabin. Habsi waa belaayee sowtaa beer luladii Buuraha dushooda narba mid ku boodaysay banaanka ku soo turray, oo ay barooranayso, sowkaa boholyowgii hubsiimihii qalaleen oo ay ba'ayeyda ku hayso, kibir baa ninkiisa baabi'iya, oo marka horana been ku imaana; markuu mool aad u balaaran bartamihi-isa ku geeyana bartaa kaa dhaqaaqa; Beerlula oo afkeedii sii wadata: ditoore waad ku mahadsan-tahay falkaan bini'aadan nimada leh ee aad noo s-amaysay, waanad aragtaa arintayda meesha ay mara-yso, wax kaqabashana in ay yeelanayso u malayn maa-ay ciqaabtii uu ninkaasi la godgalay aniga ayuu mab igeedii i haystaa ee waxaan kaa codsanayaa in



aad isiiso arjigii uu ii soo wadey, si aan u akhri-sto ereyadii ugu dambeeyey ee uu ku hadlay intii u aduunka ku noolaa , iyo dhawaaqiisii aan ka s-heega la'aa, alla dhabanadaan haystaae ma dhabaa! aa ii muuqataa dhibaatada ku haysata waxaan se uu sheegayaa in uu ila dardaarmay ala unaxariis-ygii, wuxuuna igu yiri qof hadaad iga siiso aak-hiro ayaan iilka kuufadhiyaa, marka walaaley iga aali ahaw, anigu meydakaas sida uu iila dardaar-ay ayaan u fulinayaa, mana khilaafi karo oo wax-an qaaday ballan adag oo aanan ka noqon karin.

Digtoore waxaa laga yaabaa hadii aan akhristo a-rjigaas in uu iga fududaado culayska i haya, ixs-aan waa laysku galaaye isii warqada waan ku barya-yaaye, hadii aad maal rabtana aabahay baa ku sii-naya Badbaadi naftayda.

Digtoor axmad oo aad uga xumaaday Calaacalka gab-adhaas xusuusanayana dardaarankii Moog(e ayaa ku yiri: walaal ballan waa belaaye aniguna waxaan a-hay nin axdi ka qaaday meyd oo uu xisaabtankeedu aakhiro u yaalo, marka walaaley ereyadaadu qalbi-gay idilaacinayaane iga daa.

Beerlula oo cagaheedi quruxda badnaa ee aan weli-good kaba la'aan arkin dhulka ku jiideysa oo hal-kii ay ku istaagtaba cagaheeda oo dhiig ah ku sa-shirmayaan, oo dareemayn xanuunka dhawaacyada soo gaaray intii ay laaniga ku soo ordeysey, ayaa ka baxday iridkii hore ee isbitaalka, ayadoo u soco-ta aqalkoodi; waxaase isweydiin leh, qoyskii ay ahalatay ma ogyihiin mise waa maya? Faarax markii u yimid guriga ee uu fadhayey muddo aan sidaa sii badnayn ayaa waxaa . . . . . . . . . .

Nimco oo ay deris ahaayeen arkeyseyna markii ay sii ordeysey Beerlula, ayadoo Timo qaawan kabana aan qabin, waxayna la kulantay Caasho oo ay ku tiri: Caasho maxaa ku dhacay Beerlula sow iyadii mar hore sii ordeyseyayadoo cagacad oo kaba la'?

Ayadoo guriga ku jirta ayaan ogaa, hadana waxayba ila tahay in ay joogto, ee maxaaman ka ogahay, Goormay ahayd waqtigaa?

Waxay ahayd muddo qiyaastii halsaac iyo bar laga joogo.

Faarax oo dhegeysanayey sheekadooda ayaa intuu soo boodey ku yiri: oo hadda cid garanaysa ma jirto miyaa yarta waxa helay, iyo meesha ay ku maqantahay?

Faaraxow jikadaan ku jirey ee maxaan ka ogahay, waxayba ila tahay in ay aqalka ku jirto. Caasho iyo Nimco oo halkii wada hadlaya Faaraxna uu guriga ku jiro isagoo soo lebisanaya si uu uraadiyo, ayey Beerlula oo sida ay u egtahay aan indhaha lagu hayn karin ood moodeyso in maqaarkii laga siibay cageheeda oo ay illintii indheheeda ka soo dhacday dhabanadeeda wadooyin ka samaysatay, ka soo gashay iridka; alla qaracan iyo qalbi xumo weynaa, Caasho markii ay aragtay xaaladda gabadheeda waxay af labadii dhawaaqday Barooor iyo qaylo wayna isku duubtay iyadoo ku oo yaysa, Beerlulase iyadu oohinteedi way dhamaysatay waxayna taagantahat qaracan ee hadal iyo baroor intaba ma hayso; Faarax ayaa markii uu maqlay sawaxankii afadiisa ka soo booday aqalkii, asagoo labadiisii kabood midna gacanta ku wada tii kalena gashan amakaag iyo af kala qaad ayaa ku dhacay mar kii uu arkay gabadhiisa xaaladda ay ku sugan ... , ... ayuu ku fariisiyey ... uu wey... ... dhacay; muddo markii ay ka



aamusnayd aydoo ilinta indheheeda ka soo dhacday moodo dhibic roobaad ayey ku tiri Aabe arintaydu imtixaan bay ku dambaysay, nabsigii aan horey u uruursadaan aramidiisii la ooyayaa, waa anigan il xun ee itaalkaygu yaraaday, wataa eebadii jacaylka oofahayga ku taala; umalaun maayo awood aad wax iigu tarto in aad leedahay maanta, sababtoo ah, qofnool ayaad wax iiga qaban kartaa lakiinse qof dhintay taladiisa faraha ayey ka baxday, waxaan aabow kaa codsanayaa in aad igala soo qaado warqada uu ii soo waday inta uusan dhiman, oo uu iisoo diiday dhaqtar joogey isbitaalka, hadaan helo warqadaas waxaa laga yaabaa in aan muddo sii noolaado, waxaan rabaa in aan qalbigayga ugu raaxeeyo ereyadii uu qoray intuusan dhiman.

Faarax yaab iyo naxdin ayuu dhafoorada gacanta la saartay, wuxuuna isgoo yaaban ku yiri: Aabe waayo ninku goormuuse dhintay?

Waa wiilkii aan doraad geyney saldhiga ee ahaa Mooge, aabe doraad wixii ka dambeeyey qalbigayga ayuu ku wareegaysanahayey hadii aan la kulmi lahaa gacmo furan yaan ku soo dhoweyn lahaa, waxaase nasiib darro ah in uu jiiray baauur shalay asagoo ii soo wada warqad, waxaana u malaynayaa in layga goynayo wixii aan horey u geystet, marka arjiga uu ii soo wadey waa kii aan kuu sheegay ee takhtarku ii soo diidey, waana kan aan hadda rabo in aan helo?

Oo warqadaasi maxay kuu soo celinaysaa? Hadaanan helin warqadaas ka diyaari qabrigay agtiisa.

Faarax oo aad ula tiiraanyeysan arinta mugada leh ee haysata gabadhiisa ayaa u

u qalbi qaboojiyey oo ku yiri: wax kasta ha igu k-
qaadatee waxaan ballan qaadayaa in aan gacanta-
ada soo geliyo , ku seexo taas; Beerlula iyo a-
abcheed oo wata baabuurkoodii quruxda badnaa da-
qiiqado iyadoo ayan ka soo wareegin ayey galeen
iridkii isbitaal, waxayna kula luha kulmeen digt-
oor axmad oo fa dhiya xafiiskiisa, oo ay halkii
isku weydarsadeen ereyo ay issu af garanwaayeen
asigoo uu digtoor axmad ku adkaystay in uu ful-
inayo ballan kiisii Faaraxna uu ku canaantay
in uu yahay nin iska indhatiraya qofkaas alhu-
madu hayso, waxaana ka mid ahaa ereyadii faarax:
war miyaadan ahayn qof biniaadan ah oo ka tiir-
anyoonaya waxyeelada qofka kale, miyadaan ar-
kayn ruuxa aad wax u diidayso dhibaatada ka m-
uuqata, waxay joogtaa heer nafteeda la badbaa-
isho, oo waqti waxloodiido ma joogto, keen ar-
jiga haduu wax u taraayo ka ku samirtee.
Digtoor axmad oo qancnaaya Faarax ayaa ku yiri
waan aqaan inta aad sheegeyso oo dhan, hortaabad-
na arkay dhibaatada haysa yartaan, adoon isoo-
garin ayaan siin lahaa hadii uu u sahlanyahay
sida aad moodeyso , marka walaale waad iga raali ah-
aaysaa.
Kan ka tegi maayo maanta ee ii sheeg hadaad rabto
lacag intaad doontaan ku siinayaaye.
Lacag igu filan waan haystaa eebna way igu yahay
in aad sidaas iila hadasho, kana ma aha mid aan
siyaabahaas oo kale ku dhiibayo, aduunayadoo dhan
oo dhab ah hadii faraqa layga buuxiyo ma aanan s-
iisteen, waxaana igala culus Ballantii aan qaaday.
Hadaad garan wayeey badbaadi ruuxan adigoo weliba
ah dadkii loogu talagalay badbaada kulama dagaala-
mo karo ee sharcigaan wada tegeynaa.



Waxay noqotay arintii in loo bandhigo Maxka-
mad si uu ninkasta u soobandhigto tabashadiisa;
waxaa kale oo meesha yimid Muuse oo meel uu ka
doona Muumino iyo inankeeda, muddo badana doondo-
onahayey, isagoo tacsiidiisii ka akhristay Joorna-
lka, oo ay dhalashadiisii ugudambaysay, dhimasha-
diisiina ugu xigtey isagoon arag intaa, markasta-
na lahaa yaa ku tusa, inta baddana ku maqnaa Miy-
iga, Markii uu Xabsiga ka soo baxay ee uu xamar
ku wareeray, haddana intii dhwrsanaadood ah joogey
beledka oo ka helay shaqo biyotooni ah bankiga a
dhexe da'diisuna ayan ka badnayn kontomeeyo weli-
na aan xaas yeelaan, wuxuu la kulmay isga oo aad
u tiiraanyaysan dadkan oo isku buuqsan, runtiina
Mooge wuxuu u arkayey inankiisii, waayo waxaa dh-
alay ninkii uu dadka ugu kalsoonaa, oo ahaa saax-
iibka keliya ee uu ku leeyahay aduunka, marka wa-
xayan labo isweydiiseen in uu keron lahaa Muuse
agoonka uu ka tegey saaxiibkii, wuxuuna la soo k-
ulmay doodii dhexmareysey labaii qof ee aan horey
u soo sheegnay, doodaas oo ahayd mid cajab gelis-
ay dadkii oo dhan, waxaase calwiyey qalbigiisa m-
arkii uu arkay haweenay uu xaqiiqsaday in ay tah-
ay Muumino oo ay dhinacyada ka soodaan haween ka-
le oo aad u barooranaysa, basanbaasan oo aan jir-
in wax horteeda ka muuqda oo ay aragto, markuu h-
ubsaday in ay tahay muumina ayuu dhexjiiray dad
badan oo ka sokeeyey, kadihna isagoon aan garanee-
yn waxa uu samaynayo ayuu isku duubay haweeneydii
hooga ku halqabsanaysey, iyaduna indhaha ayey ka-
la qaaday aydoo la yaaban qofka xooga badan leh
ee siku duubay, muddo markii ay fiirinaysey aydo-
xusuusta maskaxdeeda dib ugu laabatay waxay si w-
anaagsan u . . .

u heshay sawirkii Muuse oo ay u kordhisay aragtidiisii Tiiraanyo labaad iyagoo isku kor barooranaya, waxayna ku kaliftay dadkii in ay kala jiidaan oo qofba meel fariisiyaan ayagoo u wada tacsiyeynaya,; hadaba waxay dhamaantood ku mashquuleen arinta yaabka badan leh ee uu arjigu abuuray, waxaana laga noqday duugidii meydka si loogu heshiiyo dhacdadan cusub ee hortaalla maanta; waa arin cajab geli-say qofkii maqlaba waa midaan horey u dhicin ; markii loo bandhigay maxkamadii waxay go'aamisay in la dedejiyo ka gungaaridda dulucdeeda laba asbaabood oo muhiim ah awgood; waa midda koowaade in si dhaqsi ag loo asturo meydka, iyo in la ogaado sheekada faarax iyo gabadhiisa oo ah arinta labaad ; waxaa dhacday in ay labadii dhanba qabsadeen Garyaqaano uga dooda waxa ay ku dacwoonayaan, subixii axaddii saacadu markii ay ahayd sideedii aroornimo, waxa la bilaabay maxkamaddii aydoo ay ahaayeen qodobada laga doodayo kuwo cadcad, oo ah arjiga gabadha ha lasiiyo iyo lasiinmaayo oo dardaaran baa ka horeeyey; Gudoomiyihii maxkamadda ayaa wuxuu ku dhawaaqay maxkamaddu waa furantahay, hadaba waxaa la bilaabay falanqayntii dacwada oo uu bilaabay garyaqaankii u doodahayey Beer lula kadibna wuxuu yiri: waxaan maxkamadda sharafta leh u sheegayaa in uu marxuunkii arjiga u soo wadey uu ku geeriyooday dhexda soona gaarsiin waayey, hadana waad aragtaan sida ay tahay iyo waxa ay ku sugantahay, waa xaaladdaa foosha xunleh, waxayna u baahantahay in gargaar bini'aadan nimo iyo mid islaanimo intaba loo fidiyo, wax dib ah oo ka imaanaya ma jiro hadii arjiga lasiiyo inanta dardaaranka hadii qof bini'aadam ah waxyeelo ugu sugantahay [illegible] aha in laga boxo, marka waxaan mar



labaad Maxkamadda sharafta leh ka codsanayaa in ay badbaadiso nafta gabadhaas ee go'aysa, anigoo jecel in aad u aragtaan sida aan u arko.

Kaasi Wuxuu ahaa Garyaqaankii u doodahayey Beerlula, Hadana waxaa doodii la wareegey kii arjiga wuxuuna yir: waxaan maxkamadda sharafta leh ka codsanyaa in ay ilaaliso xuquuqda bini aadanka, maxaa yeelay, qofka insaanka ah dhimashadiisa iyo noloshiisa labada waa in la xurmeeyaa oo aan lagu xadgudbin, balse waxaa haboon inta aanu xukun dhicin in loo dhabagalo xaqiiqadiis, marka hadii uu rabo marxuunkii in arjiga gabadha lasiiyo kama uusan dardaarmeen, laakiin nin mowdku dul taaganyahay in uu yiraahdo yaan cidna layga siin warqadda taas waxa ku kalifay waa arin adag, oo aan dhihi karo hadii wax laga bedelo waa maalkadhac lagu sameeyey meydkaas, hadaba aniga oo qadarinaya Maxkamadda sharafta leh waxaan mar labaad ka codsanyaa in ayan wax faragelin ah ku samayn dardaarankaas;

Kadib waxaa doodii la wareegay Garyaqaankii Beer lula, aydoo labada dhinacba ay dhexmartay dood aad u adag; gabagabadii iyo gunaanadkii waxay maxakamadu go'aamisay in la fuliyo dardaarankii Mooge, laakiinse go'aankaasi ma ahayn mid u cuntama beerlula iyo aabeheed, misna waxay qaateen abiil waxa na maxkamadii koofariistay maalinkii xigey, aydoo ahayd mid ka kulul tii hore kana dood badan oo ay isugu yimaadeen dad

farabadan oo daawasho iyo dhegeysi ugu yimid xaajada ugubka ah ee aan hore loo maqlin, waa arin qofkii maqlaaba ku noqotay dhabana hays; dadkaasi waxay u badnaaye-

EEN kuwo ka kala socdey labada dhinac, oo ay la
yaab ku noqotay arintan darteed loo fadhiyo; wa-
xaa gilgishay garsoorayaashii maxkamadda, oo ay
ku noqotay liqi waa markii ay dhegeysteen dood-
ii ay uu soo jeediyey garyaqaankii Beerlula is-
agoo ku tirtirsiiyey Maxkamadda in ala badbaadiy
yo nolosha inantaan, doodaas oo u dhacday sida-
tan: Maxkamadda sharafta leh waxaan ka codsanaya
in ay dhowrto nolosha gabadhaas u go aysa in ay
akhrisato ereyadii ugu dambeeyey ee inanka ay
aawadii u intixaananantahay, cidna ma diidana in
uu ka dardaarmay, waxaase wanaagsan in aan ilaa-
alino nolosha qofka nool ee horteena taagan, M-
oogana ilaahay ha u naxariisto; guux badan ayaa
ka soo yeeray dadweynihii iyagoo u riyaaqay do-
oda ka soo yeeraysa garyaqaanka ee ku baaqaysa
badbaadinta nolosha ruuxaas, oo ayan iyagu qab-
rigeeda gacmohooda ugu qodin, waayo hadii arji-
ga lasiin waayo waxaa laga yaabaa in ay sii qa-
rracanto; gudoomiyihii maxkamadda ayaa dadweyni-
hii wuxuu u sheegay in ay maxkamadu wada tashi y-
eelandoonto, sidaa darteed ay banaanka u yar
baxaan inta laysaga soo laabanayo; maxkamadii way
soo fariisatay ayadoo dadweynihii la hortimid g-
o'aano cadcad waxayna ahaayeen sidatan: Maxkama-
ddu markii ay dhegeysatey doodii labada dhinac
markii ay dhuuxday nuxurka dacwada, oo ay isu e-
ertay dardaarankii Mooge iyo darayada haysata
Beerlula, oo maanta taagan horteena, ina baa-
han badbaado, markii ay fiirisay labada dhanba,
waxay lana huraan u aragtay Badbaada gabadhaas,
sidaa darteed waxay xukuntay in lasiiyo arjiga.
Beerlula oo aad moodo in layiri Mooge ayaa kuu



Soo noolaaday ayay intay boodey arjigii ka daftay
gacantii gudoomiyaha, mudo ayey ku naan beeshay
iyadoo marba gaar u rogeysa, dhamaan dadkii nees-
ha joogey oo dhan baa wada qalbi gadoomay, ayagoo
ka xun xaaladda murugada leh ee ku habsatay gaba-
dhaas, cidise miyey moogtahay in uu curadku yahay
ilmaha loogu jeeclyahay caruurta, maxayse kula-
tahay hadii ay ahayd inanta keli ah oo labaysay
inanka yar ee aan horey u soo sheegnay, qalbi xu-
mo iyo calooyow ayey labadeedii waalid uga soo-
meen waxay dhuunta mariyaan oo dhan, waxayna tii-
raanyadii la qaybsadeen gabadhooda baasaha jacayl
la dihindihaysa, baroor miyaa wax u soo celin, i-
leyn wax tegey dib uma soo noqdaane, qoomamana q-
iil ma noqoto, waxy noqotay qof dalanbaabi ah oo
aan garanayn meel ay u ciirsato iyo cid ay garab-
sato, caashaqa sidiisaba alloo kaa caafiya mooyee
culimo kaama daweyso, cudurweeye midkaasi alahay-
ow yarta caafi,.

Markii ay soo baxaday ayada oo sidata warq-
adii, waxaa dhinacyada kaga soo xoonsamay asxaabtii
mooge oo ay ka mid ahaayeen; Sucaad iyo Nuur " "
oo midba dhinac qabsaday ayagoo la qaybsaday bar-
oortedii waxayna ka codsatay in ay geeyaan aqal-
kii Mooge, waxaana meeshii ka soo qaaday aabehood
oo ay u sheegtay ujeedadee, mana ayan ahayn maal-
intaas qof wax lga diidi karo ee wuxuu u fuliyey
dalabkeedii, asagoo la soo qaaday Muuse, Nuur iyo
Sucaad; markii uu gurigii geeyey waxay diidey in
ay raacdo, Muusaase ka balan qaaday in uu isagu
ay raacdo, Muusaase ka balan qaaday in uu isagu
keeni doono markii ay damacdo in ay aqalka soo a-
ado, Beerlula iyo Muumina ayaa isu baroordiiaqay
waxaana ka dhamaatay hiidii iyo haadii . . . .

muddo markii ay madaxa ishaysteen ayey Beerlula weydiisey Muumino sariirta mooge; Muumino ayaa tusisay sariirtiisii kadibna way isku dultuurtay, aydoo aad u qalbi xun, waqti aan sidaas u sii badnayn markii ay sariirta ku dul fikirtet ayey la soo baxday arjigii baalaha dhiiga ku lahaa, waxayna akhriday ayadoo marba xusuusanaysa ereyadiisii, markii ay akhriday waxay dib ugu laabatay fikirkeedii dheeraa iyo tiiraanyadeedii, waxaa derbiga guriga uga muuqday Sawirkiisii oo ay cabaar indhaha la raacday, waxaase naxdin iyo yaab ku noqotay, markii ay maskaxdeedu hor keentay muuqaalkii Mooge oo uga dhexmuuqday sawirka ay sida ba'an u eegayseyee derbiga ku dheganaa, asagoo kula hadlaya ereyadii tiiranyada badnaa ee uga darnaa gantaal beerka kaga dhacay, oo ahaa: Beerlula, Beerlula adoo wax ii qabankara ayaad idiidaysaa oo aan adogana kuu qabankaro, ee anoon tala haynin amuu nabsi ku taabaa ood iitaahdaa oo aad taladayda u baahataa!
Muddo markay ereyadaas sidii jacdii Maskaxdeeda uga dhawaaqayeen ayey Furtay Boorsadeeda waxayna kala soo baxday Qalin iyo Warqad kadibna waxay qortay, arjigan imtixaankiisa waa dhamaystay!

Isla markiina waxaa ka faaruqay jirkeeda Naftii, waxaana babaday dhamaan daahyadii iyo dariishadihii, ayagoo ka tiiraanyaysan Masiibada soo martay Mooge iyo Beerlula.

DHAMAAD QAYBTA KOOWAAD.

asalkaba jaceylka
allico kaa caafiya mooyee
culimo kaama daweyso
cudur weeye midkaas
oo nadii uusan canceeniyo
nolin caawimo fiican
cidnbana kuu jaro weeye
nadiise aad la daweyso
midii aad calmaneysay
ee cindigaaga yeclaa
oo calalkaaga samaado
dawo weeye middaas.